# Hagaha dadka dalka u soo guuray

HÄMEENLINNA



HÄMEENLINNAN KAUPUNKI

Hagahan waxaa lagu sheegayaa adeegyada Hämeenlinna waxaa sidoo kale lagu hagayaa dadka dalka u soo guuray mudada ay ku jiraa wejiga hore ee u soo guurista Finland. Hagaha waxaa ku jira is-diiwaangelinta, degista guryaha, tababarada luqada iyo adeegyada guud macluumaadyo la xiriira.

Hagaha waxaa la isugu keenay hagaha dadka dalka u soo guuray ee ay sameeyeen ardayda iskuul xirfadeedka sare ee Häme wax ka barata waxaana lagu horumariyaymshruuca Infoda Dal u soo guurista ee shaqada (ESR). Horumarinta waxaa loo kaashaday magaalooyin kale, hagisyada wasaaradda arrimaha gudaha iyo shaqada iyo adeegga hagaha magaalada Hämeenlinna iyo weliba bogagga internet.

Ujeedada laga leeyahay hagahan waa in la isku dayo hagaajinta war-helista dadka deggan magaalada Hämeenlinna ee dalka u soo guuray iyo in uu kaalmo u noqdo shaqaalaha marka ay hagayaan macaamiishooda.

Hagaha waxaa isagoo qaab elekterikal ah looga helaa islamarkaasna laga daabacan karaa bogagga internetka ee magaalada Hämeenlinna.

**www.hameenlinna.fi**



## Tusmada


**1. KU SOO DHOWOOW HÄMEENLINNA! 6**
1.1 Hagis iyo adeegyada la-talinta 7
1.2 Qaabilaadda qaxootiga 8
**2 GUURIS- Sidan ayaa bilowga ku gaareysaa 10**
2.1 Ogolaanshaha joogitaanka/fiisada Finland 10
2.2 Caymisyada 11
2.3 Diiwaangelinyada – liiska xusuusta 12
2.3.1. Rajistareeshinjka 12
2.3.2. Kelada 12
2.3.3. Xafiiska canshuuraha 12
2.3.4. Adeegayada xafiiska shaqada iyo xoogsiga 13
2.3.5. Furo xisaabaadka bangiga 13
2.4 Keenista gaadiidka guurista 13
2.5 Leysinka baabuurta ee ajnabiga 15
2.6 Gaadiidka guud 16
**3 DEGISTA GURYAHA 18**
3.1 Helitaanka guriga 18
3.2 Hagisyada iyo macluumaadka la xiriira degista guryaha 19
**4. BARASHADA LUQADA FINNISHKA 22**
4.1 Waxbarashada siyaasadda xafiiska shaqada (waxbarashada maalmeed qiyaastii 8 saacadood/maalintii) 22
4.2 Machadka Vanajavesi (Koorasyada habeenki, qiyaastii 2 saac, waa lacag) 22
4.3 Naadiyada luqada finnisha (waa lacag la'aan, la iskama diiwaangelinayo) 22
4.4 Iskaa wax u barash 23
**5. RAADINTA SHAQADA, SHAQEYNTA IYO SHAQO LA'AANTA 24**
5.1 Raadinta shaqada 24
5.2 Shaqeynta 25
5.3 Shaqo la'aan 25
5.4 Canshuurista ajnabiga 26
5.5 La-talinta shirkadeed 26
**6. BARASHADA SHAHAADADA IYO ISBARBARDHIGGA SHAHAADADA DIBADDA 27**
6.1 Nidaamka waxbarashada ee Finland 27
6.2 Qeybaha waxbarashada ee Hämeenlinna ku yaal 28
6.3 Isbarbardhigga shahaadada dibadda 30
6.4 Sameynta shahaadada imtixaanka guud ee luqada 30
**7. ADEEGYADA SHACABKA 32**
**7.1 Daryeelka caafimaadka** 32
7.1.1 Gargaarka degdegga ah iyo daryeelka bukaanka ee degdegga ah 32
7.1.2 Rugaha caafimaadka 33
7.1.3 Rugaha daryeelka ilkaha 35
7.1.4 Rugaha la-talinta 36
7.1.5 Barta la-talinta caafimaadka dhalinyarada 36
7.1.6 Daryeelka caafimaadka iskuulka waxbarashada iyo iskuulka 36
7.1.7 Daryeelka caafimaadka shaqada 36
7.1.8 Qareenka bukaanka 36

**7.2 Adeegyada arrimaha bulshada** 36
7.2.1 Shaqada sooshaalka ee dadka waaweyn 36
7.2.2 Badbaadada carruurta 37
7.2.3 Rugta la-talinta qoyska 37
7.2.4 Qeybta arrimaha qoyska 37
7.2.5 Adeegyada naafada 37
7.2.6 Adeegyada dadka da'da ah 37
7.2.7 Qareenka arrimaha bulshada 38
**7.3 Carruurta iyo dhalinyarada** 38
7.3.1 Xannaano-maalmeedka 38
7.3.2 Xannaano-maalmeedyada furan iyo waxqabadka naadiga 39
7.3.3 Iskuulka hoose-dhexe 40
7.3.4 Adeegyada dhalinyarada 41
**7.4 Jimicsiga iyo isboortiga** 41
**8 WAXQABADKA DHAQAMADA BADAN** **43**
8.1 Shaqada dhaqamada kala duwan ee magaalada Hämeenlinna 43
8.2 Xarumaha xaafadaha 43
8.3 Dhaqamada badan ee Kaarisiltakeskus, ururka Setlementti ee aagga Hämeenlinna 43
8.4 Maktabadaha 44
**9. DIINTA** **45**
9.1. Kaniisadda efangeli-luteeriga ee Hämeenlinna-Vanajavesi 45
9.2 Kaniisadda ortodoksiga ee Hämeenlinna 45
9.3 Kaniisadda katooliga ee Tampere, kaniisadda mucatabka barakeysan 46
9.4 Kaniisadda xorta ah ee Hämeenlinna 46
9.5 Kaniisadda majmacaha ee Saalem 46
9.6 Kaniisadda adventti ee Hämeenlinna 46
9.7 Islaamka 47
9.8 Budhiistanimada 47
**10. KELA** **48**
10.1. Tusaalooyina manfacyada Kelada 48
10.2 Nambarada adeegga Kelada ee dalka oo dhan 49
**11. KAALMOOYINKA MARKA XAALAD XASAD AH LAGU JIRO** **50**
11.1. Gargaarka degdegga ah iyo xaaladaha halista 50
11.2. Caafimaadka dhimirka 50
11.3. Adeegyada maandooriyaha 50
11.4. Living room 50
11.5. La-talinta dhaqaalaha iyo deynta 50
11.6 Xafiiska kaalmada sharciga 51
11.7 Heeganka dhibanaha dembiga 51
11.8 Marka dhimasho timaado 51
**12. ADEEGYADA KALE** **52**
12.1 Huudheyada 52
12.2 Dhaqtarka xoolaha 52
12.3 Farmashiyayaasha 52
12.4 Turjumaadyada iyo turjumista 53
**13. WARAR GUUD** **54**
13.1 Xuquuqda codeynta ee ajnabiga jooga Finland 54
13.2 Codsashada jinsiyadda Finland 55
13.3 Waajibaadka ciidanka ee ajnabiga jooga Finland 55

13.4 Xaq u lahaanshaha ku dhaqdhaqaaqista duurka (xaqa dadka oo dhan ay leeyihiin) 55
13.5 Sinnaanta iyo faquuqa 57

**14. ADEEGYADA QARAN EE DADKA DALKA U SOO GUURAY 57**

14.1 Xafiiska dal u soo guurista 57
14.2 Bangiga wararka 57
14.3 In To Finland, Coming to work in Finland 57
14.4 Heeganka dhibanaha dembiga (RIKU) 57
14.5 Xarunta aqoonta dhaqamada badan ee Ururka dadka 58
14.6. Ururka La-talinta qaxootiga 58
14.7 Xarunbta awoodda dhaqamada badan ee Monika 59
14.8 Xarunta farshaxanka caalamiga ah ee Kassandra 59

**LIFAAQA 1:** Shaqaalaha soonaha Midowga Yurub uga soo guura Finland si uu uga shaqeeyo 61
**LIFAAQA 2:** Xubin qoyska shaqaalaha* soonaha Midowga Yurub Finland uga soo guuray si uu uga shaqeeyo 63
**LIFAAQA 3:** Finland u soo guurista shaqaaluhu ka soo guuro wadamada saddexaad ee ka baxsan soonaha Midowga Yurub 65
**LIFAAQA 4:** Xubin qoyska shaqaalaha* soonaha Midowga Yurub wadamada saddexaad ee ka baxsan Finland uga soo guuray si uu uga shaqeeyo 68
**LIFAAQA 5:** MARKA AAD HÄMEENLINNA DIBADDA UGA SOO GUURTO – Liiska xusuusta 71
**LIFAAQA 6:** Kaartada Hämeenlinna 74

# 1. KU SOO DHOWOOW HÄMEENLINNA!

Hämeenlinna waxaa dhidibada loo taagay sanadki 1639 waana caasimadda gobolka Koonfurta Finland.

**Tirada dadka deggan** 67 662 (31.12.2017)
**Baaxadda dhulka** 1785,83 $km^2$
**Isku wareegga magaalada** 455 km

Hämeenlinna waa magaalo dabeecadda ama bii'adda u dhow oo ammaan ah. Taariikhdeedu waxay gaareysaa waqtiyada dhexe arrintan darteedna waxaa hareeraha Hämeenlinna ku yaal burburka qalcado dhowr ah. Qalcadda Häme waxaa la dhisay sanadkii 1200 iyo 1300, magaalada Hämeenlinna waxay horay ugu martay sanadkii 1800 magaalo askar, maamul iyo waxbarasho. Magaaladu meel wannaagsan ayeey kaga taal wadada Dibiga ee Häme, wadada weyn, jidka xadiidka iyo masada Vanajvesi dhinaceeda. Sidoo kale waxay magaaladu marka la barbardhigo magaalooyinka waa weyn ee Koonfurta Finland ku taal meel dhexe sida Lahti, Turku, Tampere iyo Helsinki. Magaalada Hämeenlinna waxaa kamid ah sidoo kale Hauho, Kalvola, Lammi, Tuulos ja Renko.

Hämeenlinna waxaa ku sugnaa sannadkii 2017 3 345 oo qofood, kuwaas oo uu afkooda hooyo ahaa wax kale oo aan ahayn finnish ama swidish. Bulshada dalka u soo guurtay waxay ka kooban kooxo dhinaca dhaqanka iyo luqada kala duduwan.

Sidii magaalo fac weyn oo kale Hämeenlinna waxaa ka jira qaabab nololeed kala duduwan. Shaqaaleeyayaasha ugu waaweyn waa dowladda iyo hay'adaha guud, warshadaha biraha iyo mashiinada, ganacisga miyiga, ganacsiga iyo dhisidda. Magaalada Hämeenlinna waxaa maamulo, duga magaalada iyo golaha magaalada.

Meelaha loo dalxiiska tago ee ugu caansan Hämeenlinna waa qalcadda Häme, Madxafka madaafiicda ee Finland, Madxafka xabsiga, Madxafka farshaxanka Finland, jardiinada keynta ee Aulanko, Kaniisadda Hämeenlinna, Kaniisadda Vanaja, Hattelmalanharju, guriga uu ku dhashay Sibelius, Madxafka guriga Palander, qalcadda Vanaja iyo wadada tartanka ee Ahvenisto. Dhacdooyinka ugu caansan waa Amyrock, Vanaja Festival Yaanyo! Yaanyoi!, festifaalka koomiada stand-up Dhacdada carruurta Hämeenlinna ee Hippalot iyo carwada gobolka Elomessut ee dhammaadka xagaaga.

Ku soo dhowaad degista iyo ku raaxeysashada Hämeenlinna!

**Macluumaadyada guud ee xiriirka magaalada**
Guriga magaalada
Raatihuoneenkatu 9-11/PL 84
13101 HML
- **Tel. gudbin 03 6211**
- **www.hameenlinna.fi**

hameenlinnan.kaupunki@hameenlinna.fi

Cinwaanada emaylka ee shaqaaluhu waxay u qaabeysan yihiin
magaca hore.magaca qoyska@hameenlinna.fi

## 1.1 Adeegyada la-talinta iyo hagista magaaladа

Hämeelinna laga helo waxay ku shaqeeyaa goobo adeeg, goobahaas oo laga si gaar ah looga helo macluumaadka adeegyada ururada magaalada iyo bandhigyada iyo codsadiyada. Haddii loo baahdo waxaa sidoo kale kaalmo shaqaalaha looga heli karaa buuxinta codsiyada.

Adeegyada dhexe ee rugaha adeegga:

- Macluumaadka iyo kala talinta adeegyada magaalada iyo degista guryaha
- Kireynta goobaha magaalada
- Bandhigyada iyo kaartooyinka soonaha
- Dhigista codsiyada iyo dukumentiyada magaalada ku socda
- Ogolaanshiyaha kalluumeysiga ee Kanta-Hämeenlinna iyo kireynta boosaska doomaha
- Adeegyada kaasada magaalada (bixitaanka biilashada magaalada, Shirkaddaha biyaha ee Soonaha Hämeenlinna iyo biilashada adeegyada caafimaadka- qeybaha ganacsiga qarash adeeg la'aan)
- Koobiyada macaamiisha
- Laba kambuyuutar oo lacag la'aan lagu isticmaalo iyo isku-xir internet oo xarig la'aan ah
- Boorka ogeysiiska rasmiga ah ee magaalada

**Rugta adeegga ee Kastelli**
Palokunnankatu 16
• 03 621 3370
Fax 03 621 3374
Furan maalmaha shaqada 9-16

**Infada dal u soo guurista**
Kastelli
Palokunnankatu 16
Hagista iyo la-talinta arrimaha dadka dalka u soo guuray
Isniin saacadda 13.30- 16.30, Arbaco-Khamiis 13.30- 15.30
• 050 304 5472
maahanmuuttoinfo@hameenlinna.fi

Wuxuu hagaa islamarkaasna talo siiyaa dhammaan dadka dalka u soo guuray, dadka, magaalada deggan, shirkadaha iyo saraakiisha dowladda ee qaba arrimaha la xiriira dal u soo guurista.

**Rugta adeegga ee Hauho**
Punnanmäentie 18, 14700 Hauho
(Maktabadda Hauho)
Furan Isniin- Arbaco saacadda 12–19,
Khamiis- Jimco saacadda 10–16 iyo
Sabtida saacadda 10–15
• 03 621 2039

**Rugta adeegga ee Renko**
Rengonraitti 7, 14300 Renko
(Maktabadda Hauho)
Furan Isniin- Arbaco saacadda 12–19,
Khamiis- Jimco saacadda 10–16 iyo
Sabtida saacadda 10–15
• 03 621 2038

**Rugta adeegga ee Kalvola**
Hollaajantie 3, 14500 Iittala
(Maktabadda Kalvola)
Furan Isniin-Arbaco saacadda 12–19,
Khamiis-Jimco saacadda 10–16, la 10–15
• 03 621 2032

**Rugta adeegga ee Lammi**
Linjatie 4, 16900 Lammi
(Maktabadda Lammi)
AFuran Isniin- Khamiis saacadda 10–19,
Jimco 10–16, Sabti 10–15
• 03 621 3641, 03 621 2034

**Rugta adeegga ee Tuulos**
Pannujärventie 10, 14820 Tuulos
(Maktabadda Tuulos)
Furan Isniin-Arbaco saacadda 12.00–19.00,
Khamiis-Jimco saacadda 10.00–16.00.
• 03 6211, 03 621 2030

**La-talinta safarka ee Hämeenlinna**

Palokunnankatu 16, 13101 Hämeenlinna
Macluumaad ku saabsan meelaha safarka ee soonaha Hämeenlinna, adeegyada cuntada. goobaha deegaanka iyo dhacdooyinka.

Bandhigyada iyo kaartooyinka Finland oo dhan.
• 03 621 3373
tourist.info@hameenlinna.fi
• www.visithameenlinna.fi
Furan isniin-jimce 9-16

**Haddii aad ka soo wacdo meel ka baxsan Finland, nambarka jihada dalku waa +358 markaas kadibna 0 nambarka telefoonka ugu horeysa meesha waa ka baxeysaa.**
**tusaale ahaan 03 6211 -> +35836211**

## 1.2 Qaabilaadda qaxootiga

Waxay u adeegaan dadka dalka u soo guuray, qaxootiga rasmiga ah, magangalyo doonka ogolaanshaha joogitaanka la siiyay iyo dib u soo guurayaasha inkeri-finnishka, sidoo kale waxay kala shaqeysaa la-qabsashada dalka Xafiiska shaqada iyo ganacsiga, iskuulka, booliska iyo kuwa ka shaqeeya qeybta ama saktarada 3aad. Waxay kaalmo ka geysataa la qabsashada bulsho cusub iyo ka gudbidda naf iyo bulsho ahaan arrimahaas. Shaqada dhamada badan ee adeegyada dadka dalka u soo guuray waxay qabanqaabisaa waqtiyada firaaqada waxqabadyo tusaale ahaan naadiyo luqada finnishka ah, kooxo iyo dhacdooyin.

**Qaabilaadda qaxootiga**
Kastelli, Palokunnankatu 16
(Qeybta A)
• 03 621 2556
• **www.hameenlinna.fi/Maahanmuutto/**

## MAALMAHA FASAXA EE RASMIGA AH

| | |
|---|---|
| **1.1.** | Maalinta sanadka cusub |
| **6.1.** | Ciidul-qadaas |
| **Maarsho- Abriil** | Jimcaha Weyn iyo Ciidda Bariga |
| **1.5.** | Maalinta shaqaalaha aduunka |
| **Maajo** | Khamiista Hela iyo Heluntai |
| **20. iyo 26. Juun** | Malainta Sabtida u dhexeysa ee Juhanuska |
| **31.10.–6.11. sabtida soo gasha waai** | Maalinta Ciida ah |
| **6.12.** | Maalinta xornimada |
| **24. - 25.12.** | Maalinta ka horeysa ciidul-masiixiga iyo maalinta ciidul masiixa |
| **26.12.** | Maalinta fasaxa ah ee ka dambeysa Cuuld-Masiixiga |

Sida caadada ah Finland waxaa xafladeynta la bilaabo maalinta ka horeysa maalinta xafladda. Maalinta ka horeysa maalinta sanadka cusub, maalinta ka horeysa maalinta shaqaalaha, maalinta ka horeysa Yuhanuska iyo ciidul-masiixiga waa maalmo xafladeed kuwaas oo maalmaha fasaxaha ee ka dambeysa ay yihiin maalmo u badan nasasho.

**Macluumaad luqado kala duduwan ku qoran oo ku saabsan bulshada Finnishka iyo adeegyada**

- **www.infopankki.fi**
Bogagga bangiga wararka waxaa ku jira warar aasaasi ah oo ku saabsan adeegyada iyo waxqabadyada bulshada waxaana loogu talagalay dadka dalka u soo guuray waxayna ku qoran yihiin 15 luqadood oo kala duduwan.

- **europa.eu/youreurope**
Macluumaad ku saabsan xuquuqda muwaadiniinta Midowga Yurub iyo xubnaha qoyskooda iyo tilmaamooyin faa'iido leh oo loogu talagalay ku dhaqdhaqaaqidda gudaha Midowga Yurub.

- **http://ec.europa.eu/immigration/**
Macluumaad la xiriira u soo guurista midowa oo loogu talagalay muwaadiniinta ka baxsan Midowga Yurub.

# 2 GUURIS – Sidan ayaad ku bilaabaneysaa

## 2.1 Ogolaanshaha joogitaanka/ dal-kugalka Finland

### Muwaadiniinta Midowga Yurub

Muwaadinka Midowgu wuxuu jooga Finland usagoo aan diiwaangelin xuquuqdiisa joogitaanka ugu badnaan saddex bilood haddii uu wato kaarka aqoonsiga ama baasaboor shaqeynaya, islamarkaasna aan loo arag mid halis ku ah ammaanka iyo kala dambeynta guud. Haddii muwaadin midowga ah uu daganyahay Finland wax ka badan saddex bilood, waa in uu daganaanshahiisa/ daganaanshaheeda ka diiwaangeliyaa goobta shaqada ee Waaxda socdaalka Finnish

Xubinta kamidka ah qoyska muwaadinka midowga ee aan aheyn muwaadin midowga u dhashay oo jooga Finland wax ka badan saddex bilood wuxuu codsan karaa kaarka kaarka joogitaanka ee xubinta qoyska muwaadinka midowga. Kaarka joogitaanka waa in laga codsadaa saddex bilood gudahood maalinta uu dalka yimid.

### Dadka kale ee aan aheyn muwaadiniinta Midowga Yurub

Ogolaanshaha joogitaanka dalka waa bilowga hore laga codsadaa bibadda kahor imaanshaha dalka. Codsiga ruqsada daganaanshaha waxaa lagu Xareynayaa wakiilka Finland ama haddii uu codsaduhu joogo Finland goobta shaqada ee Waaxda socdaalka Finnish. Kordhinta ruqsada iyo codsiga ruqsada daganaanshaha joogtada ah waxaa lagu xareysan karaa oo kaliya gudaha Finland.
Codsiga ruqsada deganaanshaha waxaa xareyn karo oo kaliya codssadaha laftiisa/ lafteeda.

Dhaqangelinta kaarka ogolaanshaha joogitaanka kadib codsiga ogolaanshaha joogitaanka waxaa kali ah oo laga qabanayaa oo kali ah codsadaha.

### Dal ku-gal

Dal-kugal waxaa loola jeedaa ogolaanshaha joogitaanka waqtiga gaaban iyo soo gelista dal ee qofka ajnabiga ahi lagu ogolaado marka u buuxiyo shuruudahaha ku xiran imaanshaha dalka. Haddii aad ka timaado dowlad muwaadiniinta looga baahan dal-kugal waxaa sidoo kale marka la codsanayo dal-kugal loo baahan yahay caymiska safarka. Ogolaanshaha imaanshaha dalka, dal-kugalka waxaa sida guud laga codsadaa Wakiilka Finland ee jooga codsadaha dalkiisa. Muwaadinka aan dalkiisa dal-kugal laga doonayaa wuu imaan karaa Finland (soonaha Schengen), waxaase laga doonayaa in uu wato baasaboor shaqeynaya ama dukumenti safar oo kale, kaas oo ay Finland aqbalsan tahay.

Boolisku wuxuu sii wadi karaa waqtiga uu dal-kugalku shaqeynayo iyo/ama waqtiga uu qaadaneyso joogista la ogolaaday haddii qofka dal-kugalka haystaa uu soo bandhigi karoodo in ka tegista soonaha wadamada xubnaha ah aysan suurtagal aheyn sababo bani'aadminimo iyo caqabad adag dartood kahor dhamaanshaha dal-kugalka la ogolaaday iyo/ama waqtiga joogitataanka la ogolaaday.

**Waqtiga joogitaanka iyo shuruudaha guud ee ku soo gelista dal-kugalka**

Muwaadinka dalka aan dal-kugal laga dooneyn wuxuu joogi karaa 90 maalmood soomaha wadamada Schengen mudo sanad barkiis ah inta lagu jiro laga soo bilaabo maalintii uu ka soo tallaabay markii ugu horeysay xuduuda ka baxsan soonaha Schengen. Intaas waxaa dheer in marka muwaadinka ka imaanaya dal aan dal-kugal laga dooneyn uu Finland imaanayo in uu buuxiyo shuruudaha guud ee soo gelista dalka, shuruudahaasna waxay dhigayaan in qofku uusan khatar gelin karin ammaanka guud, caafimaadka shacabka iyo xiriirka Finland kala dhexeeya wadamada deriska ah.

Muwaadinka dalka dal-kugalka laga doonayo waa in uu wataa markasta marka uu soo gelayo soonaha wadamada Schengen.
(Isha warakan: www.poliisi.fi)

**Ka hubso baahidaada dal-kugalka iyo dukumentiga safarka ee Finland aad ku imaaneyso www.formin.fi ->** Baahida dal-kugalka soonaha Schengen iyo dukumentiyada safarka ee ay Finland aqoonsantahay (dalkiiba)

- Hubso baahidaada dal-kugalka ee soonaha schengen iyo dukumentiga safarka ee Finland aad ku imaaneyso
- Hagee ayaad ka codsaneysaa dal-kugalka Schengen?
- Lacagta lagu bixiyo dal-kugalka
- Ogolaanshaha dal-kugalka iyo waqtiga looga baaraandego
- Go'aanka dal-kugalka ee diidmada ah
- Koontaroolka imaanshaha dalka
- Dheereynta dal-kugalka gudaha Finland
- Dal-kugal (ogolaanshaha soo gelista dal) iyo noocyada dal-kugalyada

**Macluumaad** dheeraad ah oo ku saabsan dal-kugalyada, ogolaanshiyaha joogitaanka iyo diiwaangelinta, qiimaha ogolaanshiyaha iyo macluumaadyada xiriirka ee Wakiilada waxaad ka heleysaa bogagga internetka ee xafiiska dal u soo guurista, wasaararadda arrimaha dibadda iyo booliska.

- **www.migri.fi**
- **www.poliisi.fi**
- **www.formin.finland.fi**

## 2.2 Caymsiyada

Booqashada gaaban inta aad ku jirto waxaa kuu wanaagsan in aad wadankaada ka heysato heymiska safarka iyo jirada, si aad ugu baxsato haddii alaabtaada safarka ay wax ku dhacaan ama aad jirato.

Muwaadiniinta Midowga Yurub waxay inta aysan ka soo bixin dalkooda codsan karaan kaarta daryeelka bukaanka ee Yurub (Kaarka caymiska caafimaadka ee Yurub). Kaarka daryeelka caafimaadka Yurub waxaad ku heleysaa daryeelka caafimaad ee aadan ka maarmin inta aad sida ku meelgaarka ah u joogto wadamada kale ee Midowga Yurub ama wadamada ETA amaba Switzerland. Qofka sida joogtada ah u jooga Finland waa in uu codsadaa xeyndaabka ammaanka bulshada Finland isagoo Kelada soo maraya islamarkaasna buuxinaya codsi Y77.

## 2.3 Diiwaangelinyada- liiska xusuusta

**Marka aad Hämeenlinna si joogta ah ugu soo guurtoi xusuuo:**

**1.** Aad rejistareeshinka oo buuxi foomka foomka ogeysiiska diiwaangelinta ajaaniibta iyo ogeysiiska guurista
**2.** Aad Kelada oo buuxi codsiga xeyndaabka ammaanka bulshada ee bulshada Finland
**3.** Ka soo qaado kaarka canshuurta xafiiska canshuurta
**4.** Haddii aad shaqo la'aan tahay shaqo doone shaqo la'aan ah isaga diiwaangelin xafiiska shaqada iyo gacansiga
**5.** Furo xisaabaadka bangiga

### 2.3.1. Rejistareeshinka

Rejistareeshinka u soo qaado baasaboor, ogolaanshahaada joogitaanka dalka ama shahaadada diiwaangelinta xuquuqda joogitaanka ee muwaadinka Midowga Yurub, shahaadooyinka dhalashada, guurka, - furiinka mas'uul ka ahaanshaha ilmaha oo lagu turjumay finnish shabad sharciyeyn ahna lagu soo dhuftay. Soo sharciyeyn waxaa loola jeedaa cadeynta dukementiga ee hogaanka cadaaladda wadankaada iyo shabadda safaaradda Finland. Rejistareynta kadib waxaad heleysaa nambarka aqoonsiga qofka. Hubi in aad xaq u leedahay calaamadda degmo-guri iyo in kale.

**Rejistareeshinka Hämeenlinna**
Birger Jaarlinkatu 13
• **029 553 9361**
• **www.maistraatti.fi**

**Buuxi foomka:**
• Ogeysiiska diiwaangelinta ajnabiga
• Ogeysiiska guurista

### 2.3.2. Kela

Waaxda hawlgabka dadka, Kela ayaa xaalado kala duduwan ku bixisa ammaanka shacabka. ka mid ahaanshaha xeyndaabka ammaanka bulshada waxaa laga codsan karaa marka la doonayo in si joogto ah loo deganaado Finland. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan manfacyada Kelada waxaa laga helayaa xafiiska Kelada ee kuugu dhow ama bogagga internetka ee Kelada. Macluumaad dheeraad ah oo sidoo kale ku saabsan xuquuqda manfacyada ee dadka dalka u soo guuray waxay ku lifaaqan yihiin hagaha.

**KELA**
Rauhankatu 1
• **www.kela.fi**

**Buuxi foomka Y77:**
• Codsiga xeyndaabka ammaanka bulshada Finland deaganaansho darteed.

### 2.3.3. Xafiiska canshuurta

Xafiiska canshuurta u siiqaado nambarka aqoonsiga ee aad ka heshay rajistareeshinka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan canshuurista ajnabiga waxay ku jiraan bogga 26.

**Xafiiska canshuurta ee Sisä-Suomi, laanta Hämeenlinna**
Lukiokatu 26
• **020 612 000**
• **www.vero.fi**

**Buuxi foomka:**
- Codsigaga kaarka canshuurta isha (6 bilood ka yar)
- Codsiga kaarka canshuurta (6 bilood ka badan)

## 2.3.4. Adeegayada xafiiska shaqada iyo xoogsiga

Shaqo doone oo loo diiwaangashanaado waxay xaq u siineysaa qofka in uu helo adeegyada shaqo u raadinta iyo macluumaadyada ku saabsan fursadaha waxbarasho ee Finland. Macluumaad dheeraad ah wuxuu ku jiraa bogga 22.

**Xafiiska shaqada iyo ganacsiga ee soonaha Hämeenlinna**
Saaristenkatu 3
- **0295 041 441**
- **te-palvelut.fi**

## 2.3.5. Furo xisaabaadka bangiga

Bangiga u sii qaado baasaboor iyo aqoonsiga qofka haddii aad heshay. Bangiyada waxaa ka mid ah Nordea, Sampo iyo Osuuspankki. Lacg u dirista dalkaadu waxay suurtagal kuugu noqoneysa Adeegga safarka ee Hämeenlinna oo ku yaal boosteejada basaska, adeegga lacag dirista ee Western Union adigoo adeegsanaya. Kaash waxaad ka baxsan kartaa Otto kaararka bangiyada oo dhan.

Habka ugu badan ee Finland biilasha lagu bixiyo ama lacagaha lagu wareejiyo waa isticmaalka bogagga internetka bangiyada. Aqoonsiyada lagu galo shabakadda bangiga waxaad ka heleysaa bangiga. Biilasha waxaa sidoo kale lagu bixin karaa mashiinada lacag bixinta ee bangiyada. Bangiyadu waxaa kale oo ay keeyahay madaxyo internetka oo aad ku isticmaali karto bangiga shabakadda.

Biilshada oo kaasada bangiga kaash looga bixiyaa waa lacag.

## 2.4 Keenista gaadiidka lala soo guuray

**Canshuurista gaadiidka**

Gaadiidka laga doonayo canshuurta baabuurta waa diiwaangelintooda ama ku isticmaalidooda Finland dowladda canshuur laga siiyaa. Gaadiidka laga keeno meelaha ka baxsan Midowga Yurub waxaa sidoo kale la saaraa canshuurta qiimaha ee soo dejinta iyo kastamka. Midowga Yurub gaadiidka laga keeno canshuurta qiimaha lagama qaado lamana marsiiyo kastam.

**Ka keenista gaadiidka lala soo guuray meelo ka baxsan Midowga Yurub**

Alaabta lagala soo guuro meelaha ka baxsan Midowga Yurub iyo weliba gaadiidka waa in la ogeysiiyaa baaraandegga kastamka si lacag la'aan ay ugu daayaan saraakiisha kastamku meesha laga soo dejiyay.

**Isticmaalka gaadiidka lala soo guuray marka la soo gaaro Finland**

Qofka Finland joogtada u deggan sida caadiga ah wadooyinka uma isticmaali karyo baabuur dibadda ka diiwaangashan isagoo aan bixin canshuurta baabuurka. Dhacdooyinka qaarkood isticmaalka waa la ogol yahay. Markaas isticmaalku wuxuu u baahan yahay in Kastamka loo diraa ogeysiiska isticmaalka. Ogeysiiska waa in horay Kastamka loo sii ogeysiiyaa ama ugu dambeyn bilaabashada isticmaalka baabuurka canshuur la'aanta ah ee ku meelgaarka ah. Ogeysiiska waxaa lagu sameeyaa foomka Kastamka.

Haddii baabuurku uu leeyahay diiwaangelin shaqeyneysa ee soonaha ETA, baabuurka waxaa lagu isticmaali karaa ogeysiiska isticmaalka ee ay Kastamku aqbalay marka uu saaran yahay. Isticmaalka waxaa kale oo oo ku xiran in baabuurku uu leeyahay caymiska wadooyinka oo shaqeynaya. Haddii baabuurku uusan laheyn diiwaangelinta shaqeyneysa ee soonaha ETA, ku isticmaalka gaadiidka wadooyinka waxaa ku xiran in ka sokoow ogeysiiska isticmaalka ogolaanshaha wareejinta. Ogolaanshiyaha wareejinta waxaa bixiya xarumaha koontaroolka baabuurta iyo Kastamka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ogolaanshiyaha wareejinta waxaad ka heleysaa Trafi.

- **www.trafi.fi**

Baabuurka la doonayo in laga diiwaangeliyo Finland waxaa ugu badnaan la isticmaali karaa iyadoon canshuur la bixin ugu badnaan mudo saddex bilood ah. Waxaa la isaga baahan yahay in Kastamka arrinta isticmaalka lagu ogeysiiyay kahor inta aan isticmaalka baabuurka uusan ka bilaaban Finland. Haddii gaadiidku uusan laheyn diiwaangelinta soonaha ETA oo shaqeyneysa ama waqtigi ay diiwaangelintu shaqeyneysay ay dhamaatay, waxaa la doonayaa in la soo qaato ogolaanshaha wareejinta. Ogeysiiska isticmaalka ee Kastamku uu xaqiijiyay ayaa qasab ah inay saarnaato gaadiidka marka gaadiidka la isticmaalayo. Gaadiidku waa in uu sidoo kale lahaadaa caymiska wadooyinka Finland oo shaqeynaya. Ammaanka caymiska ee caymiska wadooyinka Finland qeybaha qaarkood wuu ka baaxad weyn weynahay kan dowladaha ETA. Si ay u sii jirto xaq u lahaanshaha isticmaalka gaadiidka ee ku meelgaarka ah waa in laga sameeyaa ogeysiiska canshuurta baabuurta shan maalin gudohood laga soo bilaabo maalinta la cadeeyay isticmaalkiisa.

## Ogeysiiska canshuurta baabuurta ee gaadiidka loo soo raray Finland

Canshuurta gaadiidka waa in Kastamka la ogeysiiyaa haddii la doonayo in gudaha Finland lagu isticmaalo.
Gaadiidka laga keeno meelaha ka baxsan Midowga Yurub Kastamka ayaa waxaa uu canshuurta baabuurta ka sokoow ka sameynayaa go'aanka kastaminta, kaas oo lagu cadeynayo kastamin la'aanta iyo canshuur qiimo la'aanta. Ka dhimista canshuurta baabuurta ee sidii alaab lala soo guuray oo kale ah waa ugu badnaan 13450 yuuro.

## Ogolaanshaha dhimsita canshuurta waxaa loogu baahan yahay:

- Dhimista canshuurta waxaa loo ogolaadaa markiiba hal gaadiid, tusaale ahaan hal baabuur, hal baabuurta alaabta lagu qaado ama hal mooto.
- Qof gaar ah oo baabuurkiisa keensada si uu isticmaalo.
- Keensadaha gaadiidka oo ah mid dalka u soo guuray.
- Qofka oo dibadda joogay ugu yaraan hal sano oo xiriir ah kahor inta uusan guurin.
- Gaadiidka oo ahaa guurista kahor lahaanshaha soo guuraha ama lamaanihiisa iyo in uu soo guuruhu isticmaalayay ugu yaraan mudo lix bilood ah.
- Gaadiidka oo la keenay markii la soo guurayay.
- Soo guuraha oo si ku meelgaar ah u joogay Finland sanadkii ka horeeyay soo guurista. Haddii joogista ay sababtay safar fasax oo iska caadi ah ama sababo la barbardhigi karo, joogista waxaa loo arki karaa mid ku meelgaar ah haddii ay qaadatay ugu badnaan 72 maalmood. Cadada la xusay waxaa lagu dhaafi karaa sababo qasab ah oo kali ah.
- Qofka horay u deganaa Finland oo aan aheyn markuu soo guurayay mid aan waqti kasta arday aheyn sanadkii la soo dhaafay
- Haddii qofka soo guuraya uu horay u keenay wadanka gaadiidka canshuurta laga dhimay mid laga dhaafay, kan canshuur dhaafka

lagu bixyay ama waqtiga loo cayiman ee ku meelgaarka ah oo dhamaaday kahor inta uusan u soo guurin Finland.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan keenista alaabta lala soo guuro dalka, canshuurta baabuurta iyo dukumentiyada loogu baahan yahay waxaa bixiya la-talinta kastamka

**Talo bixinta kastamka**
- **0295 5201**
- **fakis 020 492 1812**

**Foomka su'aalo weydiinta ayaa waxaa lagu qoraa karaa su'aalaha qoraalka ah oo laga helo www.tulli.fi >Weydi talo bixinta kastamka.**

## 2.5 Kaarta wadista gaadiidka ee dibadda

Midowga Yurub ama dolwad soonaha ETA ah kaarka wadista baabuurta ee laga bixiyay ama Wadamada Waqooyiga Yurub kaarka wadista baabuurta ku meelgaarka ah ee laga bixiyay waxay xaq u siinayaan qofka wata in uu ku kaxeeyo gudaha Finland gaadiid u dhigma kan ku qoran kaarka. Wadaha gaarigu waa in uu noqdaa mid 18 sano buuxiyay. Xaq u lahaanshaha wadistu waxba kama quseeyso in qofku uu Finland dalxiis ku joogo ama uu rasmiyan ugu soo guuray.

Wadamada ku jira heshiiska Geneva ama Viena ee wadooyinka qofka rasmiga u deggan kaarka qaran ama midka caalami ee wadista baabuurta ee la siiyay ee si rasmi ah loogu turjumay luqada finnishka ama iswidishka waxay xaq u siineysaa in uu ku wato Finland gaadiidu dhigma kan ugu qoran kaarka wadista mudo hal sano ah laga soo bilaabo maalinta uu dalka soo galay haddii uu qofku buuxiyo Finland shuruudaha da' da ee looga baahan yahay qofka u dhigma ee gaadiidkaas oo kale wada. Xaq u lahaanshaha wadistu waxay ku saleysan tahay heysashada kaarka wadista ee la siiyay qofka sida rasmiga ah u deggan wadanka heshiiska saxiixay. Joogista waqtiga ku meelgaarka ah (tusaale ahaan mudada kala bedeshada ardayga) kaarka laga soo qaatay wadanka heshiiska saxiiyay xaq uma siinayo wataha in uu ku wado baabuur Finland.

### U bedelista kaarka wadista baabuurta ee laga bixiyay Midowga Yurub dowladaha ETA kan Finnishka

Kaarka wadista baabuurta ee aan aheyn kan ku meelgaarka ah oo laga bixiyay dowladaha ETA iyo Midowga Yurub qofka si rasmi ah u deggan Finland ama ugu yaraan lix bilood wax ku baranayo wuxuu ku bedelan karaan kaarka wadista baabuurta ee u dhigma kan uu wato isagoo aan wax imtixaanka wadista ah aan sameyn. Codsiga kaarka wadista waa in qof shaqsiyan u geeyaa booliska.

### Ku bedelashada kaarka laga bixiyay dowladaha ku jira heshiiska wadooyinka ee Geneva ama Viena kan Finnishka

Kaarka wadista ee laga bixiyay dowladaha ku jira heshiiska Geneva ama Viena qofka rasmiga u deggan Finland wuxuu ku bedelan karaa codsiga ogolaanshaha wadista imtixaan cusub la'aan A1-, A- iyo heerka B. Codsiga kaarka wadista waa in qofku shaqsiyan u geeyaa booliska. Ogolaanshaha kaarka wadista waa in lix bilood gudohood Finland looga codsadaa kahor inta aysan dhamaanin xaq u lahaansha wadista ee ku saleysan kaarka wadista dibadda. (Isha warka: www.poliisi.fi).

## OGEYSIIS!

Marka gaadiidka la wado xilliga jiilaalka waa in taxadir gaar ah la muuhiyaa taraaraxa wadooyinka daryood baabuurka waa in la gelayaa shaagaga jiilaalka ugu dambeyn 1da bisha Disembar.

Goobaha gaadiidka la dhigan karo ee magaalooyinka waxaa lagu calaamadeeyay calaamadaha wadooyinka waana in booska laga bixiyaa mashiinada lacagta dhigashada baabuurka ama waa in la isticmaalaa saacadda dhigashada baabuurta iyadoo la raacayo waqtiga dhigashada ee calaamadda wadooyinku ay tilmaameyso. Waqtiga dhigashada baabuurta oo la dhaafaa waxaa ka dhalanaya ganaax.








## 2.6 Gaadiidka dadweynaha

### Gaadiidka baska

Hämeenlinna shirkado badan ayaa ka shaqeeya basaska. Tikidhada baska waxaa loo iisan karaa iyagoo mar kaliya ah am iyagoo a xilliyado kala duduwan ah. Tikidka marka kaliya ah wuxuu joogaa qiyaastii 3 yuuro kan kaarka bisha ah ee soonaha bartamaha magaalada wuxuu joogaa qiyaastii 49 euro (2014). Hagaha wadooyinka ee ku jira bogagga internetka ee Adeegga safarka waxaad si sahlan uga raadsan kartaa wadooyinka basaska ee gaadiidka deegaanka, macluumaadyada cinwaanada, magacyada wadooyinka ama waxaad adeegsan kartaa kaartada.



**Boosteejada basaska iyo Adeegga safarka ee Maykahuolto**
Eteläkatu 1
Waxay furan tahay Isniin- Jimco 8–18,
Sabti 9–15.30
- **0200 4000**

(jadwalada waqtiga, qiimaha,
ballansashada tikidhada)
- **www.matkahuolto.fi**

**Gaadiidka tareenka**

Gaadiidka tareenka ayaa waxay Hämeenlinna uga baxaan jihada Tampere iyo Helsinki. Boosteejooyinka dhextaalka ah waxaa loo sii mari karaa magaalooyinka kale ee Finland.




**Basaska deeegaanka iyo tikidhada**
Kastelli, Raatihuoneenkatu 11
www.hameenlinna.fi/Palvelut/
joukkoliikenne/Waltti

**Boosteejada Tareenka**

Hämeentie 16
- **www.vr.fi**

**Tagsiyada**

Taksiga waxaa laga qaadan karaa goobaha u gaarka ah takaasida ee lagu sugo ama waxaad ka dalban kartaa haddii dooneyso xarunta dalabaadka:

- **03 106 2500**
- **www.aluetaksi.net**

## Eray-bixin

| | |
|---|---|
| **Hyvää päivää** | Maalin wannaagsan |
| **Anteeksi** | Iga raali ahoow |
| **Paljonko maksaa...?** | Imisuu joogaa? |
| **Mistä lähtee (juna/bussi/taksi)...?** | Halkee buu ka baxayaa (tareenku/ basku/taksigu)…? |
| **Mihin aikaan?** | Waqtigee? |
| **Missä on...?** | Xagee ku taalaa…? |
| **Kuinka kaukana/lähellä on...?** | Fogaantiisu/ dhowaantiisu waa intee…? |
| **Kiitos!** | Mahadsanid |

# 3 DEGISTA

Guryaha la dego waxaa Hämeenlinna loo soo maraa shirkadaha guryaha, shirkado gaar ah iyo iyo shaqsiyaad gaar ah. Ogeysiisyada gfuryaha bannaan waxaad ka heleysaa jaraa'idyada, internetka iyo xafiisyada guryaha. Xafiiska guryaha gaarka loo leeyahay laga ijaarto waxaad ku garaneysaa LKV oo la soo gaabshay. Xusuuso in marwalba aad buuxiso ogeysiiska guurista marka aad guurto, si aad warqaaha boostada cinwaanka saxda ah ugu hesho! Ogeysiiska guurista waxaad ka heleysaa Rajistareeshinka, boostada ama goobaha adeegga ee magaalada.

## 3.1 Helista guri

Guryaha shirkadda guryaha waxaa lagu codsadaa iyadoo codsi la geysanayo xafiiska guryaha.

**Shirkadda Guryaha ee Hämeenlinna**
Raatihuoneenkatu 7
- **03 625 161**
- **www.hmlasunnot.fi**

**VVO Hämeenlinna**
Sibeliuksenkatu 2
- **020 508 4200**
- **www.vvo.fi**

**Kireynta guryaha ee Hämeenlinna SKV**
Saaristenkatu 3
- **010 228 4025**
- **www.skv.fi**

Realia ayaa iyaduna waxay ardayda siisaa guryaha mu'asasada ardayda ee soonaha Hämeenlinna.

**Guryo maamulida Realia ee Hämeenlinna**
Saaristenkatu 3
- **010 228 7000**
- **www.realiaisannointi.fi**

Guryaha Mu'asasada guryaha ee Dadka waaweyn ee Hämeenlinna waxaa laga kireeyaa dadka da' ahaan buuxiyay li60 sano ee deganaa Hämeenlinna ama degmooyinka la xiriira ugu (5) sano oo xiriir ah.

**Mu'asasada guryaha dadka da'ada ah ee Hämeenlinna**
Korentokatu 4 A 16 13200 Hämeenlinna
- **03 621 4240**
- **www.hvas.fi**

**Bogga internetka ayaa ka raadsan kartaa guryaha soonaha Hämeenlinna:**
- **www.asunnot.oikotie.fi**
- **www.vuokraovi.com**

**Bogagga internetka ee magaalada waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shirkadaha guryaha ee ka hawlgala soonaha Hämeenlinna:**
- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Asuminen-ja-ymparisto/Asumisen-palvelut/Vuokra-asunnot/**
- **www.hame.fi > asuminen > asuntotarjonta** ama bixinta dhulka guryaha lagu dhiso – bixinta guryaha waxaad ka sii galeysaa bogagga hantida guryaha kala gudbia waxaad halkaas ka heleysaa Jaraa'idka guryaha iyo joornaalka shabakadda ee Furaha guriga



## 3.2. Hagisyo iyo macluumaad la xiriira degista guryaha

Marka aad guri kireysanayo samee markasta heshiiska kirada oo qoraal ah. Heshiiska kirada waxaa looga heshiiyaa dibaajiga kirada, lacagta biyaha iyo maalinta bisha ee kirada la bixinayo iyo weliba waqtiga heshiis ka bixista. Lacagta dibaajiga kiradu inta badan waa 1–2 oo u dhiganta kirada guriga. Marka heshiiska kiradu uu dhamaado adiga ayaa laguu soo celinayaa lacagta dibaajiga haddii aad guriga si wannaagsan u daryeeshay islamarkaasna aad kirada si fiican isaga bixisay. Haddii gurigu uu baahan yahay dayactir ama kiro laguugu leeyahay waxaa dibaajiga lagu bixinayaa qarashkaas.

Markaa aad dooneyso inaad ka guurto guriga iska hubi waqtiga heshiis ka bixista, waxaa loola jeeda waqtiga ay tahay inaad ogeysiiso qofka aad guriga ka kireystay kahor waqtiga aad guriga ka baxeyso. Inta badan waqtiga ka bixista heshiisku waa 1 bil. Ka bixista heshiiska kadib waxaad mas'uul ka tahay bixinta kirada bisha xigta. kala heshii qofka aad guriga ka kireysatay ka bixista heshiiska waqti hore oo kugu filan. Nadiifi guriga kadibna u celi qofka guriga kaa kireystay furayaasha oo dhan.

**Marka aad guri cusub uu guureyso:**

**1)** Samee heshiiska kirada
**2)** Boostada ama rejistareeshinka ka samee ogeysiiska guurista.
**3)** Samee heshiiska korontada (kala heshii waqtiyada bixinta/sanadkii).
**4)** Hubso mas'uulka guriga ee shirkadda gurigaada iyo dayactiraha (inta badan waxay ku yaalaan boorka ogeysiiska ee meesha jaranjaradu ka bilaabato).
**5)** Ogeysiis soo guuristaada mas'uulka (ogeysiiska soo gelista) kana dalbo cadey codsiga kaalmada kirada dartiis (dhambalka diiwaanka guriga ama foomka Kelada AT2).
**6)** Haddii aad qaadato kaalmada kirada, ogeysii markasta Kelada isbedelada ku dhaca deegaankaada.
**7)** Caymiska guriga ka soo qaado shirkadda caymiska.
**8)** Samee ruqsadda telefishinka iyo haddii loo baahdo ruqsadda satalaytka. Anteenada lama rakibi karo ruqsad la'aan.
**9)** Xeerarka kala nidaamka ee shirkadda guriga si fiican u aqri.
**10)** Mas'uulka guriga ka hubso booska baabuurta la dhigto, kaltanka sawnada iyo xuquuqda isticmaalka iyo lacagta qolka dhar dhaqashada.

### Heshiiska korontada

Shabakadda korontada soo qaada ee Hämeenlinna waxaa iska leh Elenia. Korantada waxaad ka iibsan kartaa soo saarayaasha korontada kii aad doonto laakiin waa in soo wareejinta korontada lacag la siiyaa Elenia. Heshiiska soo gudbinta korontada waxaa lagu sameyn karaa telefoonka ama internetka. Xusuuso inaad heshiiski hore ka baxdo ama aad u soo wareejisato cinwaanka cusub marka aad guureyso. Hämeenlinna kuma yaalaan xafiisyada soo gudbiyayaasha korontada.

- **www.elenia.fi**

Macluumaadka la xiriira baratansiinta heshiiska korontada wax aad ka heli kartaa:

- **www.energiavirasto.fi**
- **www.sahkonhinta.fi**

### Lacagta biyaha

Haddii aad kiro deggan tahay inta badan lacagta biyuhu waxay la socotaa ijaarka ama gooni ayaa loogu daray. Kuwa deggan guryaha milkada ah waa inay heshiiska biilka biyaha la galaan Shirkadda Biyaha ee Soonaha Hämeenlinna.

**HS - Vesi**
Paroistentie 7

- **03 621 2279**
- **www.hsvesi.fi**

### Xiriirka internetka

Finland waxaa ka shaqeeyaa adeegyada internetka shirkado badan islamarkaasna kala duduwan oo bixiya. Sidoo kale xiriirka internetyadu waa ku aad u kala duduwan. Ka hubso mas'uulka guriga isku xirka internetka ee guriga lagu rakibi karo. Isku xirka waxaa sidoo kale lagu heli karaa fiilo la'aan. Qiimaha iyo waxyaabaha ay kala wataan marka aad isbarbardhigeyso waxaa xisaabta lagu dartaa xawaaraha isku xirka, qiimaha lagu furayo iyo waqtiga lagu keenayo. Xiriirka internetyada waxaa iibiya tusaale ahaan DNA, Elisa, Telia-Somera iyo saunalahti.

### Dingiinta dabka

Finland waxaa ka jira sharci faraya in guri kasta la geliyo qalabka dabka ka diga. Keenista digniinta dabka waxaa mas'uul ka ah qofka guriga deggan, waxaa loola jeeda waa adiga shaqadaada. Xusuusnoo in aadn ka taxadirto in digniinta dabku uu shaqeynayo.

### Habenta qashinka

Shirkadaha guryaha waxaa inta badan daaradooda yaal weelal lagu uruuriyo qashinka isku darka ah, kan warqadaha, qaarkoodna waxay leeyihiin weel lagu uruuriyo haraaga cuntada, muraayadaha, biraha iyo kartoonada. Qashinka isku darka ah iyo kan haraaga cuntada waxaa lagu shubaa bac xiran kadibna lagu ridaa meelaha loo diyaariyay, qshinada kale bac lama geliyo. Finland kala habeynta qashinka aad ayaa loo tixgeliyaa. Beteriyada dukaamada ayaa lagu celin karaa. Meelo badan oo magaalada ku yaal ayaa waxaa loogu talagalay uruurinta karaatoonta, biraha iyo muraayadaha. Qashinada badan waa in la geeyaa soonaha qashinka lagu geeyo ee Karanoja. Macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan kala habeynta qashinka iyo dib u isticmaaliddiisa waxaad ka heleysaa bogagga internetka ee Shirkadda Kiertokapula. Dhammaan meelaha dib u isticmaalidda ee loogu talagalay qalabka korontada iyo qshinka halista ah waxaad ka heleysaa cinwaanka www.kierratys.info.

**Soonaha Qashinka la geeyo ee Karanoja, Hämeenlinna**
Karanojantie 145

- **03 628 5900**
- **www.kiertokapula.fi**

### Ku halmaamista furaha gudaha guriga

Haddii aad furahaada ku halmaanto gudaha guriga marka aad ka baxdo guriga, la xiriir

daryeelaha guriga. Nambarka telefoonka ee daryeelaha guriga waxaad ka heleysaa boorka ogeysiiska ee shirkadda gurigaada. Wuu imaanayaa si uu kaaga furo guriga laakiin adeegaas waa lacag.

## Iibsashada guri ama boos

Qofka ajnabiga xitaa wuxuu si xornimo leh uga iibsan karaa Finland guri, daar hantiyeed ama boos. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan boosaska waxaad ka heleysaa rugta adeegga isticmaalka dhulka ee magaalada.

**Barta adeegga isticmaalka dhullka iyo bay'ada ee magaalada**

- **03 621 2310**
- **mypalvelupiste@hameenlinna.fi**
- **http://www.hameenlinna.fi/Palvelut/Kaavat-ja-rakentaminen**

# 4. BARASHADA LUQADA FINNISHKA

Hämeenlinna luqada finnishka waxaad ka baran kartaa, koorasyada Xafiiska shaqada iyo ganacsiga, naadiyada luqadaha ama iskaa.

## 4.1 Waxbarashada siyaasadda xafiiska shaqada (waxbarashada maalmeed qiyaastii 8 saacadood/maalintii)

Haddii aad shaqo la'aan tahay, waxaad heli kartaa adeegyada waxbarashada dib u dajinta ee Xafiiska shaqada iyo xoogsiga si aad uga barato luqada finnishka, dhaqanka iyo cilmiga bulshada. Si aad kooraska u gasho Xafiiska shaqada iyo xoogsashada isaga diiwaangeli shaqo laawe shaqo doon ah kadibna dhigo halkaas codsiga waxbarashada la-qabsashada. Waxbarashooyinka la qabsashadu waxay bilowdaan sanadka oo dhan waana heerar kala duduwan oo xirfado kala duduwan loo qaabeeyay. Koorasyadu waa lacag la'aan dhigashadoodana waxaa lagu qaadanayaa kaalmada la-qabsashada.

**Xafiiska shaqada iyo xoogsashada ee Hämeenlinna**
Saaristenkatu 3
- **0295 041 441**
- **www.te-palvelut.fi**

## 4.2 Machadka Vanajavesi (Koorasyada fiidki, qiyaastii laba saacadood/todobaadkii, waa lacag)

Haddii aad shaqeyso waxaad luqada finnishka ka baran kartaa gelinka dambe koorasyada fiidki ee machadka Vanajavesi. Koorasyada waxaa la iska diiwaangeliyaa Janaayo iyo Sebtembar. Barnaamijka koorasyada machadka Vanajavesi waxaa boostada loogu diraa guri kasta waxaad sidoo kale ka heleysaa machadka Vanajavesi. Kastelli iyo maktabadda. Koorasyadu waa lacag.

**Vanajaveden opisto**
Paasikiventie 2 (Warshadda dharka)
- **03 621 2572**
- **www.vop.fi**

## 4.3 Naadiyada luqada finnishka (waa la cag la'aan, la iskama diiwaangeliyo)

Naadiyada luqada finnishka ee mutadawaca iyo lacag la'aanta ah waxaa lagu qabtaa aqalka wax wadaqabsiga (Kumppanuustalo). Naadiyadu inta badan waa barqadi waxaana loogu talagalay ardayda heer kasta ka jooga luqada. Naadiyada waxaa lagu sameeyaa leylisyo waxaana lagu bartaa aqrinta iyo hadalka.

**Kumppanuustalo**
Kirjastokatu 1

**Wixii macluumaad dheeeraad ah ee la xiriira naadiyada kala xiriir:**

- **03 621 2560**
- **www.hameenlinna.fi/ maahanmuutto**

**Ururka Setlementti ee agaarka Hämeenlinna**
- **050 326 9146**
- **www.hmlsetlementti.net**

Xagaayada waxaa barashada luqada finnishka qabanqaabiya sidoo kale jaamacadda xagaaga ee Häme.
- **www.hameenkesayliopisto.fi/**

## 4.4 Barashada iskaa ah

Meelaha aad barashada finnishka ee iskaa ah kaalmo uga heleyso waxaa kamid ah Setlementti iyo xarumaha xaafadda ee Bariga iyo Galbeedka. Maktabadda waxaad amaan uga heleysaa buugaag wax laga barto iyo cajaladaha cd:ga ee dhegeysiga.

**Internetka waxaad ka heleysaa leylisyada luqada finnishka tusaale ahaan:**
- **www.infopankki.fi**

**Xarumaha xaafadaha**
- **www.lahiokeskus.fi**

**Xarunta xaafadaha barigu waxay ku talaa Katumalla**
Kanervatie 1

**Xarunta xaafadaha galbeedku waxay ku taalaa Nummella**
Sammontie 4

# 5. SHAQO RAADIN, SHAQEYN IYO SHAQO LA'AAN

## 5.1 Shaqo raadin

Qof kasta oo Finland rasmi u deggan wuxuu xaq u leeyahay in ka shaqeeyo Finland. Xafiiska shaqada iyo xoogsashada ayaa boosaska shaqooyinka ee bannaan ku soo gudbiya boorka ogeysiiska iyo internetka. Horay u soo qaado aqoonsigaada iyo shahaadooyinkaada waaya aragnimadaada shaqo iyo waxbarashadaada. Waqtiga lasin taariikhdaada aqooneed iyo shaqo. Xafiiska shaqada waxaa lagaaga caawinayaa raadinta shaqo ama waxbarasho adiga kugu haboon. Xafiiska shaqada iyo xoogsashada waxaad ka daabacan kartaa codsiyada iyo taariikh shaqo-nololeedkaada. Caawimaad xitaa waad u heleysaa hawshaas haddii aad weydiisato. Boosaska shaqada xitaa adigu waxaad iskaa uga raadsan kartaa jaraa'idyada, internetka, shirkadaha shaqaalaha ijaara ama dadka aad taqaano iyo bogagga internetka ee degmooyinka, shirkadaha iyo ururada.

- Dhammaan dadka dalka u soo guuray waxaa talo siinaya adeegyada dadka dalka u soo guuray ee Xafiiska shaqada iyo xoogsashada.
- Arrimaha Midowa Yurub iyo Caalamiga waxaa talo ka bixiya la-taliyaha EURES.

**Adeegyada xafiiska shaqada iyo xoogsashada ee Häme, Hämeenlinna**
Saaristenkatu 3
- **0295 041 441**
- **toimistot.te-palvelut.fi/hameenlinna**

Shirkadaha shaqaalaha ijaara waxay bixiyaan shaqooyin ku meelgaar ah. Waqtiga xiriirka shaqada ku meelgaarka ahi uu qaadanayo waxay ku xiran baahida macaamilku uu shaqaale u qabo waxayna u dhexeysaa dhowr maalmood iyo waqti ka sii dheer. Shaqada ijaarku waxay kaga duwan tahay xiriirki shaqo ee soo jireenka ahaa in shaqo bixiyuhu uu yahay shaqaale kireeyaha. Dad badan ayaa shaqo joogta ah helay kadib markii ay soo mareen ijaarka shaqaalaha.

**XAFIISYADA IJAARKA SHAQAALAHA ka shaqeeya ee deegaanka Hämeenlinnawaa:**

**Barona**
Arvi Kariston katu 9, Liikehuoneisto 2
- **www.barona.fi**

**Eilakaisla**
Vankanlähde 7 (Innopark)
- **www.eilakaisla.fi**

**Go On -Yhtiöt**
Kirkkorinne 4
- **www.go-on.fi**

**Opteam**
Kasarmikatu 6,
Xarunta dukaamada Optelli dabaqa 2aad
- **www.opteam.fi**

**VMP Group**
Hallituskatu 2
- **www.vmp.fi**

**SeutuRekry**
Sibeliuksenkatu 1 A 8, 2. krs.
- **www.seuturekry.fi**

## 5.2 Shaqeynta

Shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay mushaar waafaqsan heshiiska shuraadaha shaqada ama shuruudaha xilka iyo bii'ad shaqo oo ammaan iyo caafimaad leh. Mushaarka, saacadaha shaqada iyo xaaladaha shaqo waxaa heshiis shaqo oo qoraal ah lagala gelayaa shaqo bixiyaha. Marka uu xiriirka shaqadu dhamaado, xusuuso inaad codsato shahaadada shaqada. Waxaad iyada taas ugu baahan tahay marka aad shaqo cusub raadsaneyso ama aad shaqo la'aantaada diiwaangelineyso.

Marka aad jiran tahay oo aadan shaqo aadi karin waa inaad aadaa dhaqtarka. Waxaad dhaqtarka ka heleysaa cadeyn fasaxa jirada darteed. Marka uu jiran qofka shaqaalaha ah waxaa saaran waajib ah in shaqo bixiyaha u keeno shahaadada dhaqtarka. Kelada ayaad ka heli karaa lacagta jirada haddii ay jiradu waqti dheer qaadato.

Bii'ada shaqada, waa goobta shaqadu waa inay qofka shaqaalaha ah u ahaataa mid ammnaan ah, heshiiska shaqaduna waa in uu sidoo kale ahaadaa mid raacsan sharciyada Finland iyo heshiisyada. Dhibaatooyinka la xiriira arrimahan waxaad caawimaad uga heleysaa iskaashatooyinka xirfadleyda iyo xafiisyada badbaada shaqada. Macluumaad ku saabsan badbaadada shaqada oo luqado kala duduwan ku qoran waxaa laga helaa tusaale ahaan bogagga internetka ee iskaashatooyinka xirfadleyda: SAK, Metalliliitto, Rakennusliitto iyo PAM.

**Hay'adda maamulka aagga, Badbaadada shaqada**

- **0295 016 620**
- **tyosuojelu.etela@avi.fi**
- **www.tyosuojelu.fi**

## 5.3 Shaqo la'aan

Haddii aadan shaqo heysan waa inaad shaqo laawe shaqo doon ah isaga diiwaangelisaa Xafiiska shaqada iyo xoogsashada. Xafiiska shaqada wuu kuu fidinayaa adeegyo kaa caawinaya adiga helitaanka shaqo ama waxbarasho islamarkaasna hagaajinaya aqoontaada. Koorasyo kala duduwan ayaad adigoo soo maraya Xafiiska shaqada iyo xoogsashada kartaa. Xafiisku wuxuu sidoo kale kaala talinayaa aasaasashada shirkad. Qofka shaqo la'aanta ahi wuxuu Kelada ka heli karaa kaalmo lacageed mudada uu shaqo la'aanta yahay. Ka hubi Xafiiska shaqada iyo xoogsashada xuquuqda ammaanka shaqo la'aaneed (bayaanka siyaasadda xoogga shaqada).

**Adeegyada xafiiska shaqada iyo xoogsashada ee Häme, Hämeenlinna**
Saaristenkatu 3

- **0295 041 441**
- **www.te-palvelut.fi**

## 5.4 Canshuurista ajaniga

Waajibka canshuureed ee ajnabigu wuxuu ku xiran yahay dhirirka waqtiga joogista iyo in shaqo bixiyuhu uu ka diiwaangashan yahay Finland iyo in kale. Canshuurista macluumaad ku saabsan waxaad ka heleysaa xafiiska canshuuraha iyo bogagga maamulka canshuuraha, qeybta xaaladaha caalamiga ah. Bogagga waxaa ku jira macluumaadyo guud oo ku qoran luqada ingiriiska iyo ogeysiisyo dhowr ah oo ku qoran luqado kale. "Macluumaadka canshuuraha ee loogu talagalay shaqaalaha dibadda uga imaanaya Finland si ay uga shaqeeyaan" waxaa lagu turjumay ingiriis, jarmal, faransiis iyo ruush. Macluumaadyada xiriirka xafiiska shaqada bogga 13.

- **www.vero.fi/fi-FI/Syventavat_veroohjeet/Kansainvaliset_tilanteet**

Shaqaalaha canshuurtiisa ku bixinaya Finland waxaa u wannaagsan in uu xafiiska canshuuraha ka hubsado canshuurta boqolkiiba inta uu bixinayo. Haddii canshuurta la bixiyay ay boqolkiiba hooseysay canshuurta aan la bixin mudada sanadkaas lagu jiray waxaa laga qaadayaa guga xiga. Haddii la bixiyay canshuur dheeraad ah mudada sanad canshuureed lagu jiray dib ayaa inta dheeraadka ah loogu soo celinayaa xisaabaadka bangiga ee canshuur bixiyaha bisha Disembar. Kaarka cusub ee canshuurta waxaa boostada lagu diraa sanad kasta bisha Janaayo. Boqolkiiba canshuurta inta la bixinayo isbedel ayaa lagu sameyn karaa inta uu sanadku socdo haddii la ogyahay isbedel ku imaanaya dakhliga. Macluumaadyada xiriirka ee xafiiska canshuuraha bogga 13.

## 5.5 Talo-siinta shirkadaha

Haddii aad ka fekereyso aasaasidda shirkad waxaad la-talin uga heleysaa Xafiiska shaqada iyo xoogsashada iyo Xarunta shirkadda cusub. Kaalmada horumarinta waxqabadka shirkadda waxaad ka heleysaa Shirkada horumrinta

ee la yiraahdo Linnan Kehitys Oy. Hämeenlinna waxaa sidoo kale ka hawlgala Machadka shirkadlaha ee Finland, kaaso o tababar dheeraad uga heleyso shirkadlenimada.

**Xarunta shirkadda cusub**
Sibeliuksenkatu 2 B, 5. kerros
- **040 559 1547**
- **www.hameenuusyrityskeskus.fi**

**Linnan Kehitys Oy**
Visamäentie 33, Visatalo
- **03 6241 0000**
- **info@linnan.fi**
- **www.linnan.fi**

**Shirkadleyda Hämeenlinna**
Talaskuja 3
- **050 303 9996**
- **www.hmlyrittajat.fi**

**Machadka Shirkadlaha ee Finland**
Viipurintie 4 (Verkatehdas)
- **010 841 4000**
- **www.syo.fi**

# 6. BARASHADA SHAHAADADA IYO ISBARBARDHIGGA SHAHAADADA DIBADDA

## 6.1 Nidaamka waxbarashada ee Finland

**Nidaamka waxbarashada Finland wuxuu ka kooban yahay**

- Sagaal sano oo waxbarasho aasaasi ah, taas kahorna wuxuu cunuggu xaq u leeyahay in uu ka qeybqaato waxbarasho-horaad sanad ah.
- Waxbarashada ka dambeysa dugsiga hoose-dhexe waxaa ku jira waxbarasho xirfadeed aasaasi ah oo inta badan 3 sano qaata.
- Waxbarashada heerka sare ee lagu bixiyo iskuulaadka xirfadda sare iyo jaamacadaha.

Qofka heysta shahaadada aasaasiga ah ee xirfaddu wuxuu leeyahay aqoonta aasaasiga ah ee xirfaddaas uu buurtay iyo aqoonta looga baahan yahay nolosha shaqo. Waxbarashooyinki hore iyo waaya aragnimada shaqo waxay gaabin karaan waqtiga waxbarashada. Waxbarashada shahaadado iskuul xirfadeedka sare waxay qaadataa 3,5 ilaa iyo 4,5 sano. Jaamacaduhu waxay xoogga saaran cilmi baarista aqooneed iyo waxbarashada la xiriirta. Waxbarashada dadka waaweyn ayaa sidoo kale Finland mid ku badan. Macluumaadka hore ee ardayga, xirfadaha iyo xaaladiisa nololeed ayaa xisaabta lagu darayaa marka waxbarashada dadka waaweyn lagu qabanqaabinayo waxbarashada ardayga. Waxbarashada dadka waaweyn waxaa lagu fidiyaa heerarka waxbarasho oo dhan.

Finland sida caadiga ah waxbarashada machadyadu waa lacag la'aan. Marka aad waxbareyneyso waxaad waxbarashadaada kaalmada waxbarashada uga heli kartaa Kelada (fiiri bogga 84). Isha warka www.oph.fi



### Codsiga wadajirka ah iyo codsashada waxbarashada

Nidaamka codsi oo u gaar ah ayeey leeyihiin iskuulaadka xirfadda ee aasaasiga ah, iskuul xirfadeedyada sare iyo jaamacaduhu. Iskuulaadka badankooda waxaa lagu dalbadaa codsiga wadajirka ah. Codsiga wadajirka ah waxaa la xirgeliyaa laba jee sanadkii; codsiga wadajirka ah ee guga waxaa lagu codsadaa waxbarashada deyrta bilaabaneysa codsiga wadajirka ah ee deyrtana waxaa lagu dalbadaa waxbarashada billaabaneysa Janaayada sanadka xiga. Haddii codsuhu uusan shahaadada dugsiga dhexe ka heysan Finland wuxuu codsan karaa codsiga wadajirka ah ee la bedeli karo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waqtiyada codsiga iyo arrimaha la xiriira codsashada iyo foomka codsiga waxaad ka heleysaa Xafiiska shaqada iyo xoogsashada, qeybaha waxbarashada ama bogagooda www. Codsashada wax ku barashada luqad qalaad waxay inta badan si toos ah uga dhacdaa qeybta waxbarashada. Dadka codsanaya qadka luqadaha qalaad ee qeybta waxbarasho xirfadeedka waxaa loo qaban karaan imtixaan luqaadeed lagu ogaanayo in codsaduhu uu yaqaan aqoon luqadeed ku filan waxbarashada darteed. Foomamka codsiga tooska ah ee ka baxsan codsashada wadajirka ah waxaa laga helayaa qeybta waxbarashada. Waxaa kale oo bogagga qeybta waxbarashada ku jiri kara foomamka oo elekterik ah.

**Macluumaad ku saabsan codsashada shahaadooyinka aasaasiga ah ee afka ingiriiska ku baxa waxaad ka heleysaa:**

- **www.admissions.fi**
- **www.universityadmissions.fi**

## 6.2 Qeybaha waxbarashada ee Hämeenlinna ku yaal

Hämeenlinna waxaa ku baran kartaa waxbarashada asaasaasiga ah, barashada xirfadda aasaasiga ah, barashada xirfadda tacliinta sare, waxbarashada dadka waaweyn ama jaamacadda furan. Iskuulaadyada qaarkood waxay leeyihiin koorasyada diyaarinta waxbarashada Finnishka ee ku jiheysan dadka dalka u soo guuray.

### Dugisga sare ee dadka waaweyn

Hämeenlinna waxaad ku sameyn kartaa shahaadada qalin-jebinta dugsiga dhexe, ama dugsiga sare ee dadka waaweyn

**Qaybta waxbarasha dadka waaweyn ee dugsig sare ee Lyseo**
Linnankatu 12–14
- **050 5090 757**
- **www.kktavastia.fi**

### Dugsiga sare ee dadka waaweyn

Qeybta waxbarashada xirfadda waxaad ku sameyn kartaa shahaadada xirfadda ee aasaasiga ah. Taas waxaa la aadaa dugsiga dhexe ama sare kadib. Halkaas waxaa wax ku baran kara dhalinyarada iyo dadka waaweyn. Machadka xirfadaha Tavastia waxaa kale oo dadka dalka u soo guuray uu u qabanqaabiyaa waxbarashada diyaarinta waxbarashada xirfadda aasaasiga ah (MAVA). Waxbarashadu waxay bilaabataa Agoosto waxayna dhamaataa Juun. Waxbarashada waxaad ku baraneysaa luqadaha finnishka iyo ingiriiska, isticmaalka kambuutarka, xisaabta, bayolojiga, taariikhda iyo waxyaabo kale. Waxbarashadan waxaad toos uga codsan kartaa qeybta waxabarashada ama Xafiiska shaqada ayaad u soo mari kartaa. Waa inaad qori taqaan, aqri taqaan islamarkaasna wax finnishka aad ku hadli taqaan. Machadka xirfadaha Tavastia dadka dalka u soo guuray waxay wadajir wax ula baran karaa finnisha, intaas waxaa dheer waxbarashooyinka qaar

dadka dalka u soo guuray waxay leeyihiin kooxo u gaar ah.

**Machadka xirfadaha ee Tavastia**
Hattelmalantie 8
- **03 65 811**
- **www.kktavastia.fi**

AMMATTIOPISTO TAVASTIA

**Waxbarasho xirfadeedyada waxaa kale oo Hämeenlinna ka bixiya**

**Machadka xirfadda ee Häme**
- **http://www.hami.fi**

**Machadka washadeynta hilibka**
- **www.ltk.fi**

**Xarunta baxnaanada iyo waxbarashada ee Kiipula**
- **www.kiipula.fi**

## Hyria

Koorasyo kala duduwan iyo waxbarashada dadka dalka u soo guuray ayaa ka jira Xarunta waxbarashada ee dadka waaweyn. Goobta shaqada ee Hyria waxay ku taalaa Hyvinkää, Riihimäki, Hämeenlinna iyo Helsinki.

**Hyria: Goobta shaqada ee Hämeenlinna**
Hämeentie 11
- **019 778 21**
- **www.hyria.fi**

## Iskuul xirfadeedka sare ee Häme

Iskuul xirfadeedka sare ee Häme waxaad luqada finnishka ama ingiriiska ku baran kartaa shahaadooyinka tacliinta sare. Iskuul xirfadeeda sare ee macallinka ama macallimadda waxaa suurtagal ah in lagu barto waxbarista tacliinta xirfadda ee dadka dalka u soo guuray. Waxaa kale HAMK lagu baran karaa koorasyada diyaarinta tacliinta sare ee loogu talagalay dadka dalka u soo guuray. Wax ku barashada iskuul xirfadeedka sare waxay u baahan tahay aqoon fiican oo luqada finnishka ah.

**Iskuul xirfadeedka sare ee Häme**
Visamäentie
- **+358 3 6461**
- **www.hamk.fi**

HAMK
HÄMEEN AMMATTIKORKEAKOULU
UNIVERSITY OF APPLIED SCIENCES

## Jaamacadda furan

Jaamacadda furan waa mid u furan dadka oo dhan, gelitaankeeduna kuma xirna waxbarashada aasaasiga ah ama da' midna. Waxbarashadu waa lacag. Jaamacadda furan waa meesha ku wannaagsan in lagu sii ogaado waxbarashada jaamacadda. Koorasyadu waxay ka kooban yihiin waxbarashooyinka ay bixyaan jaamacadaha kala duduwan ee Finnishku. Jaamacadda furan waxaa wax looga baran karaa habab kala duduwan tusaale ahaan, ka qeybgalista fool ka fool ah iyo leylisyo, qaab dhinacyo badan ama qaab aqoondirsad ama shabakadeed.

**Jaamacadda xagaaga ee Häme**
Sibeliuksenkatu 25 B
- **03 6474 070**
- **www.hameenkesayliopisto.fi**

## Heshiis waxbarasho

Waxbarashada heshiiska waxaa lagu sameyn karaa shahaadada xirfadda takhasuska ama aasaasiga ah. Heshiiska waxbarashada waxaa loola jeedaa in aad xirfadda ku baraneyso goobta shaqada casharada qorlaaka ahna qeybta waxbarashada. Ardayga ayaa keensanaya booska shaqada ee heshiiska waxbarashada. Xafiiska

deegaanka ee heshiiska waxbarashada ayaa ka caawinaya wadashaqeynta qeybta waxbarashada si waxbarashadu u hirgasho.

Heshiiska waxbarashadu waa heshiis shaqo oo ku meelgaarna una dhexeeya shaqaaleeyaha, waxaana ardayaga la siinayaa mushaar waafaqsan heshiiska shuruudaha shaqada. Waxbarashada heshiiska waxbarashadu wuxuu ku haboon yahay dhalinyarada iyo dadka waaweyn. Xafiiska soonaha heshiiska waxbarashada ee soonaha Hämeenlinna ayaa sameeya heshiiska waxbarashada ee uu dhexeeya shaqaalaha iyo shaqo bixiyaasha deegaanka wuxuuna boosaska waxbarashada ee heshiiskaas la xiriira ka iibsadaa qeybha waxbarashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan heshiiska waxbarashada waxaad ka heleysaa xafiiska heshiiska waxbarashad aiyo Xafiiska shaqada iyo ganacsiga.

**Xafiiska heshiiska waxbarashada ee soonaha Hämeenlinna**
Hattelmalantie 25 dhismaha K
- **03 658 1415**
- **www.kktavastia.fi/oppisopimustoimisto**

## 6.3 Isbarbardhigga shahaadada dibadda

Maamulka waxbarashada ayaa go'aamiya in shahaadada dibaddu ay ka shaqeyneyso Finland kadibna aqoonsada. Aqoonsashada shahaadada waxaa loola jeedaa shahaadada dibadda aqoonsashada la siinayo shaqeynteeda marka lagu codsanayo shaqo ama waxbarasho.

Shaqo bixiyayaasha qeybaha gaarka loo leeyahay iyaga ayaa iskood u qiimeeya haboonaanshaha shahaadada dibadda marka ay go'aansanayaan xulashada shaqaalaha. Qeybaha waxbarashada iyo iskuulaad tacliinta sare waxay go'aan ka gaaraan siinta ku haboonaanshaha waxbarashada sii socota ee shahaadada dibadda iyo u aqoonsashada kuwa la aqbalay koorasyada dibadda lagu soo sameeyay marka shahaadada lau sameynayo Finland.

Xafiisyada hoos ku xusan ayaa go'aamiya xuquuqda sameynta xirfadda iyo isticmaalka magaca xirfadda. Tusaale ahaan dhanka xirfadaha daryeelka caafimaadka go'aamada waxaa ka gfaara Hogaanka ilaaliya ruqsadda majaladda bulshada iyo caafimaadka Valvira
(www.valvira.fi).

**Maamulka waxbarashada**
PL 380, 00531 Helsinki
- **+358 (0)40 348 7555**

recognition@oph.fi

- **www.oph.fi/tutkintojentunnustaminen**
- **www.oph.fi/examenserkannande**
- **www.oph.fi/recognition**

## 6.4 Sameynta shahaadada imtixaanka guud ee luqada

Shahaadooyinka imtixaanka guud ee luqada (YKI) waa imtixaano loogu talagalay dadka waaweyn, waxayna cabiraan aqoonta luqada ee xaaladaha isticmaalka. Shahaadada imtixaanka guud ee luqada waxaa lagu sameyn karaa luqado badan oo kala duduwan.

Shahaadada imtixaanka guud ee luqada finnishka ama iswidishka waxaa lagu tilmaamaa aqoonta luqadeed ee ay ku xirantahay helitaanka dhalashada Finland. Imtixaanka shahaadooyinka luqada ee gudaha Hämeenlinna waxaa qabanqaabiyaa Vanajaveden opisto.

(ka hubi qabanqaabiyaha bogga internetka: www03.oph.fi/kielitutkinnot).

Imtixaanku waa lacag. Imtixaanka foom ayaa la isku soo ogeysiiyaa. Foomka waxaad

ka heleysaa qabanqaabiyaha imtixaanka ama bogagga internetka ee Maamulka waxbarashada. Is ogeysiisnta kadib waxaa boostada laguugu soo diraa tilmaamyo ku saabsan ka qeybgalka imtixaanka iyo bixinta lacag ka qeybgalka. Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay shan qeybood: fahamka qoraalka, qoris, dhismaha iyo eray-bixin, fahamka hadalka iyo hadal. Qeybaha oo dhan waxaa la sameynaya isku maalin.

**MACLUUMAAD DHEERAAD:**

**Bogagga internetka ee maamulka waxbarashada waxaad ka heleysaa maalmaha imtixaanka iyo waqtiyada is diiwaangelinta.**

- **www.oph.fi/koulutus_ja_tutkinnot/kielitutkinnot/yleiset_kielitutkinnot**

**Aqoonta luqadeed ee la iska doonayo marka la codsanayo dhalashada.**

- **www.migri.fi/**

**-> jinsiyadda**
**-> helitaanka jinsiyadda**
**-> codsiga jinsiyadda**
**-> aqoonta luqadeed ee la isaga doonayo codsiga jinsiyadda.**



# 7. ADEEGYADA GUUD

## 7.1 Daryeelka caafimaadka

Hämeelinna waxaa ka shaqeeya toban rugo caafimaad ah. Rugaha caafimaadka waxaa isticmaali kara qofka rasmiyan u deggan Hämeenlinna waxayna u kala qeybsan yihiin deegaan deegaan.

**Macluumaadka rugtaada caafimaadka waxaad ka heleysaa:**
• sii gudbinta telefoonka **03 6211** ama **03 6219000** (nambarka sii gudbintu kuguma xirayo telefoonada ballanta waqtiyada ee rugaha caafimaadka) ama
• Rugaha adeegga ee magaalada ama
• Adeegga kaarta ee bogagga internetka magaalada **www.hameenlinna.fi/Terveys/Palvelut/Missä on oma terveysasemani**, halkaas oo aad ka fiirsan karto adigoo cinwaanka waafajinaya rugtaada caafimaadka.

Rugaha caafimaadka ee Kauriala, Bartamaha iyo Vanajavesi waxay ku yaal rugta caafimaadka ee weyn cinwaanka Viipurintie 1–3. Rugaha kale ee caafimaadku waa Hauho, Idänpää, Jukola, Kalvola, Lammi, Ojoinen iyo Renko.

Waqtiga ballanta ee dhaqtarka iyo kalkaalisada caafimaadka waa in horay loo sii qabsadaa.Dadka ka weyn 18 sano waxaa laga qaadayaa lacag saddexda ugu horeysa ee qaabilaadda dhaqtarka. Haddii aan la tegin ballanta dhaqtarka ee rugta caafimaadka waxaa qofka ka weyn 15 sano laga qaadayaa lacagta ballanta aan la baajin. Waqtiga waa in la baajiyaa ama la wareejiyaa ugu dambeyn hal saac kahor.

**Ballanta waqtiga ee dhaqtarka ama kalkaalisada caafimaadka waxaa lagu sameyn karaa:**
• Iyadoo la tegayo xafiiska rugta caafimaadka ama la wacayo nidaamka wicitaanka ee rugta caafimaadka

**Ballanta telefoonka ee waqtiga rugaha caafimaadka waxaa ku jira nidaamka dib u soo wicista:**
Macaamilka ayaa nambarka wacaya islamarkaasna dhegeysanayo fariinta illaa ay ka dhamaato (ma ahan qasab in wax xulasho ah la sameeyo), nambarka telefoonka ayaa keydsamaya, kalkaalisaduna dib ayeey u soo waceysaa qiyaastii 30 daqiiqo gudohood, dabcan isla maalintaas. Waqtigu waa ka badan karaa ama ka yaraan karaa, waxa ku xiran tahay tirada wacayaasha. kalkaaliyaha dib kuu soo waca ayaa xaaladda qiimeynaya baahida daryeel iyo degdegta la qabo, kadibna wuxuu dhaqtraka ama kalkaalisada caafimaadka ballan ka qabanaya. Ballamaha dhaqtarka ee aan degdegga aheyn waqtiga la sugayo waa celcelis ahaan 14 maalmood. Rugaha caafimaadka waxaa kale oo lagu daryeelaa bukaanada heeganka, ballanta waqtiga nambarka ballanta waqtiga ee rugta caafimaadka. Haddii xabadku ku xanuunayo, neeftu ku dhibeyso ama wax lamid ah waa in toos loo aadaa Gargaarka degdegga ah ee Heeganka wadajirka ah fiiri meesha 7.1.1.

**Heeganka rugta caafimaadka:**
waxaad ballanta heeganka ka qabsan kartaa rugtaada caafimaadka maalmaha shaqada saacadda 8–15

**Cusbooneysiinta warqadda daawada:** Xafiiska rugta caafimaadka ayaad dhigi kartaa warqadda daawada si loo cusbooneysiiyo. Warqadda daawada inta badan waxaa la soo qaataa shan (5) maalin gudohood. Warqadaha daawada ee dadka deegaanada kale lama cusbooneysiiyo.

Lacagta lagu qaato adeegyada daryeelka caafimaadka 1.1.2014.

**Lacgta booqashada waxaa la qaadaa saddex jeer ee ugu horeysay, markaas kadib lagama qaado kalandarka sanadkaas inta lagu jiro.**

### 7.1.1 Gargaarka degdegga ah iyo daryeelka bukaanka ee degdegga ah

Jirooyinka degdegga ku bilowda iyo dhaawacyada aan lala sugi karin daryeelka rugtaada caafimaadka waxaa lagu daryeelaa rugta gargaarka degdegga ah ee Isbitaalka dhexe ee Kanta-Häme (Ahvenistontie 20). Xaaladda ay naftu halis ku jirto waxaa qasan ah in la soo waco xarunta degdegga.

## Nambarka halista guud ee Finland 112

Nambarka halista ama degdegga waxaa ka heleysaa booliska, dab-damiska iyo ambalaasta. Waxaad caawimaadda ku heleysaa luqadaha finnishka, iswidishka iyo ingiriiska. Macluumaad dheeraad ah **www.112.fi**

**1.** Wac nambarka degdegga 112 islamarkaasna xaalad halis ah ama wax degdeg ahi ay dhacaan
**2.** Sheeg waxa dhacay iyo meesha aad ka soo waceyso
**3.** Ka jawaab su'aalaha
**4.** Sida laguu hagay wax u samee
**5.** Jooji telefoonka marka laguu fasaxo

| | |
|---|---|
| **Qiimaha booqashada ee saddex booqasho ee ugu horeysa** | 14,70 € |
| **Qiimaha daryeelka gaaban qeybta ee daryeelka maalinta daryeelka** | 34,80 € |
| **Qiimaha heeganka** | 29,30 € |
| **Ballanta aan la baajin** | 36,20 € |
| **Cadeynta iyo bayaanka dhaqtarka** | 36,20 € |
| **Cadeynta kaarka wadista** | 43,60 € |
| **Cadeynta Salmonella** | 36,20 € |

Qiimaha ay dabooleyso waa 679 € kalandarka sanadka ilaa dhamaadka sanadka 2014.

## 7.1.2 Rugaha caafimaadka

| | |
|---|---|
| **Rugta caafimaadka ee Idänpää** | Anttilankatu 4<br>Ballanta waqtiga tel. 03 621 9145 |
| **Rugta caafimaadka Jukola** | Eeronkuja 6<br>Ballanta waqtiga tel. 03 621 9150 |
| **Rugta caafimaadka Kauriala** | Viipurintie 1-3, dhismaha D, dabaqa 2aad<br>Ballanta waqtiga tel. 03 621 9155 |
| **Rugta caafimaadka Keskusta** | Viipurintie 1-3, dhismaha E, dabaqa 1aad<br>Ballanta waqtiga tel. 03 621 9165 |
| **Rugta caafimaadka Ojoinen** | Veteraanipolku 1<br>Ballanta waqtiga tel. 03 621 9170 |
| **Rugta caafimaadka, Vanajavesi, dhinaca galbeed iyo** | Ballanta waqtiga ee rugta caafimaadka Vanajavesi<br>tel. 03 6219180 ja 03 6219185 |
| **Rugta caafimaadka Hauho** | Vihniöntie 5, 14700 Hauho<br>Ballanta waqtiga tel. 03 621 9140 |
| **Rugta caafimaadka Kalvola** | Nordstedtintie 6, 14500 Iittala<br>Ballanta waqtiga tel. 03 621 9160 |
| **Rugta caafimaadka Lammi** | Rugta caafimaadka<br>Evontie 33, 16900 Lammi<br>Lammi /waqooyi Ballanta waqtiga tel. 03 621 9130<br>Lammi /koonfurta Ballanta waqtiga tel. 03 621 9120 |
| **Rugta caafimaadka Renko** | Rengonraitti 28, 14300 Renko<br>Ballanta waqtiga tel. 03 621 9175 |

**RUGAHA CAAFIMAADKA EE GAARKA AH:**

- Kilinikada Linna **www.linnanklinikka.fi**
- Terveystalo **www.terveystalo.com**
- Mehiläinen **www.mehilainen.fi**
- Rugta caafimaadka ee ciyaalka **www.lastenlaani.net**
- Rugta caafimaadka ee Haweenka iyo kuwa uurka leh **www.laakarikulma.fi**

**OGEYSIIS!!** Kelada waxy magdhabeysaa qeyb kamid ah qarashka dhaqtarka gaarka ah ama dhaqtarka ilkaha iyadoo la waafajinayo qiimaha magdhawga ee loo qariray iyo weliba uurka iyo dhalmada qarashka ay sababeen. Magdhawga daawada Keladu waxay ka bixisaa daawooyinka uu dhaqtar qoray, kuwaas oo marka kaarka Kelada la tuso farmishiyaha looga dhimo qiimaha daawada.

### 7.1.3 Rugaha daryeelka ilkaha

Dhaqtarkaada ilkuhu wuxuu ka unkanmayaa meesha aad deggan. Rugtaada daryeelka ilkaha waxaad ka hubsan kartaa cinwaanka internetka: **www.hameenlinna.fi/hammashoito** ama wicitaanka ballanta waqtiga.

Haddii aad tegi karin waqtigi aad ballansatay waa in la baajiyaa ama la wareejiyaa maalinta ka horeysa ballanta ugu dambeyn. Waqtiga qaabilaadda aan la isticmaalin islamarkaasna aan la baajin ama la wareejin ugu dambeyn saacad kahor waqtigi ballanta waxaa dadka ka weyn 15b sano laga qaadayaa lacag ganaax ah.

**Nambarka ballanta waqtiga ee daryeelka ilkaha:**
**• 03 621 9100**
Ballanta waqtiga ee dhaqtarkaada ilkaha maalmaha shaqada iyo waqtiyada heeganka ee maalmaha fasaxa iyo goobaha.

| | |
|---|---|
| **Rugta daryeelka ilkaha ee rugta caafimaadka dhexe** | Viipurintie 1–3, dhismaha E dabaqa 3aad |
| **Rugta daryeelka ilkaha Hauho** | Vihniöntie 5, 14700 Hauho |
| **Rugta daryeelka ilkaha Hätilä** | Viipurintie 32,<br>13210 Hämeenlinna |
| **Rugta daryeelka ilkaha Jukola** | Eeronkuja 6,<br>13500 Hämeenlinna |
| **Rugta daryeelka ilkaha Kalvola** | Nordstedtintie 6, 14500 Iittala |
| **Rugta daryeelka ilkaha Lammi** | Evontie 33, 13600 Lammi |
| **Lammi Evontie 33, 13600 Lammi Rugta** | Rengonraitti 28, 14300 Renko |

**Lacagta macaamiishu bixiyaan ee daryeelka ilkaha:**
**• www.hameenlinna.fi/Palvelut/Terveyspalvelut/Terveyspalvelut--liikelaitos/Asiakasmaksut/**

## 7.1.4 Rugaha la-talinta

Marka laga shakiyo in uur jiro waxaa ballan laga qabsadaa kalkaalisada caafimaadka ee rugta la-talinta hooyada. Macluumaadka rugtaada la-talinta waxaad ka heleysaa rugtaada caafimaadka. Rugta la-talinta hooyanimada waxaa la tegaa ilaa dhalmada. Rugta la-talinta hooyanimadu waxay adeegyo u sameysaa qoyska inta uurka la leeyahay, dhalmada iyo inta uu cunuggu sariirta saaran yahay. Adeegyada rugta la-talinta hooyanimadu waa u lacag la'aan qoysaska reer Hämeenlinna. Marka uu cunuggu dhasho waxaa loowareegaa rugta la-talinta dhallaanka. Rugta la-talinta dhallaanka waxaa lagula socdaa caafimaadka cunugga. Rygta la-talinta waxaa loo tagaa si xiriir ah booqashooyinkuna waa lacag la'aan.

Cunuggu wuxuu rugta la-talinta dhallaanka tagaa ilaa uu 6 sano ka gaarayo. Kun epäilee raskautta, varataan aika.

## 7.1.5 Goobta talo bixinta caafimaadka dhalinyarada

Goobta talo bixinta caafimaadka dhalinyarada waxaa loogu talagaly da'da u dhexeysa 14–25 sano, kuwaas oo u baahan la talin iyo caawimaad la xiriirta arrimaha caafimaadka, tusaale ahaan caafimaadka dhimirka, arrimaha kahortaga dhalmada iyo koontarolka caafimaadka. Dhalinyarada waxaa u suurtagal ah inay kula kulmaan kalkaaliye ama kalkaaliso caafimaad, cilmu-nafsiyaqaan iyo dhaqtar. Booqashoyinku waa lacag la'aan.

**Goobta talo bixinta caafimaadka dhalinyarada**
Viipurintie 1–3, rugta caafimaadka ee weyn garabka F.
Qaabilaaddu ballan uma baahna
**• 03 621 3920, 050-5461389**
Waqtiga telefoonka Isniin- Jimco saacadda 10.30-11.30

## 7.1.6 Daryeelka caafimaadka ee iskuulka iyo waxbarashada

Uskuul kasta waxaa fursad looga helayaa daryeelka caafimaadka. Iskuul kasta waxaa loo magacaabay kalkaasliso caafimaad. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa macallinka ama macallimada cunugga.

## 7.1.7 Daryeelka caafimaadka ee shaqada

Shaqo bixiyaha ayaa waxaa waajib ku ah in uu qabanqaabiyo daryeel caafimaad. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa shaqo bixyaha. Daryeelka caafimaadka shaqada waxaa lagu daryeelaa oo kali ah caafimaadka la xiriira shaqada.

## 7.1.8 Qareenka bukaanka

Haddii aadan ku qanacsaneyn adeegyada caafimaadka ee lagu siiyay waxaa lala xiriiri karaa qareenka bukaanka ee rugta caafimaadka.

**Qareenka bukaanka**
Rugta dhexe ee caafimaadka
Viipurintie 1–3 dhismaha G, dabaqa-P
Waqtiga wicitaanka Isniin- Arbaco saacadda 9.00–10.00
**• 03 621 9880**
**• www.hameenlinna.fi/Palvelut/Terveyspalvelut/Potilasasiamies**

## 7.2 Adeegyada bulshada ama sooshaalka

### 7.2.1 Shaqada sooshaalka ee dadka waaweyn

Shaqada sooshaalka ee dadka waaweyn waxay gacan ka geysataa islamarkaasna talo ka bixisaa xaaladaha nololeed ee kala duduwan marka lagu jiro, sidoo kale waxay ogolaadaan kaalmada noloshada oo ah kaalmo lacageed. Kaalmada nolosha waxaa la codsan karaa marka dakhliga kale ee ku

soo gala uusan ku filnayn waxyaabaha ku baxa nolosha aan laga maarmin.

**Rugta talo bixinta shaqada sooshaalka ee dadka waaweyn iyo kaalmada noloshada**
Rugta adeegga Kastelli, Palokunnankatu 16
Nambarada kaltanka, ballan waqti uma baahna
Waxay furantahay Isniin- Jimco saacadda 9–16
Hegayaalka sooshalka, waqtiga wicitaanka isniin- jimce inta u dhaxaysa saacadaha 10 – 11 Lambarada telefoonka:
**www.hameenlinna.fi/Palvelut/Sosiaalipalvelut/Sosiaalityon-palvelut/Yhteystiedot/**

## 7.2.2 Badbaadada carruurta

Hufnaanta carruurta waxaa ugu horeyn ka mas'uul ah waalidka. Saraakiishu waxay xaaladda soo faragelinayaan marka uu yimaado war sheegaya in cunuggu aanu wannaagsan horumarkiisuna uu halis ku jiro. Tusaale ahaan, in cunugga jir ahaan la edbo waa macmnuuc. Haddii cunugga welwel laga qabo badbaadada carruurta ayaa waxay cunugga iyo waalidka ku caawin karaan kaalmooyin waxqabad oo kala duduwan.

**Adeegyada badbaadada carruurta**
- **040-707 2061**
- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Perheiden-palvelut/Lastensuojelu/Yhteystiedot/**

## 7.2.3 Rugta la-talinta qoyska

Rugta la-talinta qoysku waa meel qoysaska hagitaan iyo talo looga siiyo barbaarinta carruurta. Rugta la-talinta qoyska waa lala xiriiri karaa haddii cunugga welwel ka jira ama loo baahan yahay in laga sheekeysto hooyonimada ama aabanimada. Waqtiga in horay loo sii qabsadaa. Booqashooyinku waa lacag la'aan.

**Rugta la-talinta qoyska**
Talo bixinta telefoonka iyo ballamada waqtiga Isniin kasta, Talaado kasta iyo Khamiis kasta saacadda 10–12
- **03 621 3326**

## 7.2.4 Qeybta arrimaha qoyska

**Qeybta arrimaha qoysku waxay macaamiisha uga adeegtaa arrimaha soo socda:**
Cadeynta aababnimada, mas'uuliyadnimada cunugga, degista, xuquuqda la-kulmidda, masruufidda iyo talo-siinta soo qaadashada ilmaha.

**Kastelli**
Palokunnankatu 16
- **03 621 2494**

## 7.2.5 Adeegyada naafada

Qofka naafada ah wuxuu xaq u leeyahay adeegyo gaar ah. Tusaale ahaan haddii naafadu ay nolosha adkeynayso wuxuu heli karaa tusaale ahaan qalabka la kaalmeesto ama adeegyada gaadiid ku qaadista. Adeegyadu waxay ku soo marayaan dhaqtarka ama shaqaalaha sooshaalka.

**Adeegyada naafada**
Ansarikuja 1, 13100 Hämeenlinna
- **03 621 5076**

## 7.2.6 Adeegyada dadka da'da ah

Adeegyada iyo hagisyada loogu talagalay dadka ka weyn 65 sano iyo ehelkooda u dhow. Caawiyayaasha adeegga ayaa talo ka siiya macaamiisha cusub adeegyada iyo waxqabadyada guud, gaarka ah iyo qeybta saddexaad. Booqashada guriga waxaa lagu sahmiyaa baahida adeegga ee macaamilka waxaana sidoo kale laga caawiyaa haddii loo baahdo buuxinta codsiyada.

**Adeegyada dadka da'da ah**
Waxay talo ku bixisaa rugta adeegga ee Kastelli, Palokunnankatu 16
- **03 621 3103**

## 7.2.7 Qareenka arrimaha sooshaalka

Qareenka arrimaha sooshaalka waxaa lala xiriiri karaa marka aan lagu qanacsaneyn adeegyada sooshaalka ee la helay. Adeegyada qareenka arrimaha sooshaalku waa lacag la'aan.

**Macluumaadka qareenka arimaha sooshalka**
- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Sosiaalipalvelut/Sosiaaliasiamies/**

## 7.3 Carruurta iyo dhalinyarada

## 7.3.1 Xannaano-maalmeed

Dhammaam carruurta kayar da'ada iskuulka waxay xaq u leeyahay xannaano-maalmeedka degmada, xannaano-maalmeedka qoyska, ama shirkadda xannaano-maalmeedka gaarka ah. Xannaano-maalmeedka qoyska waxaa lagu qabanqaabiyaa guirga cunugga la xannaaneynayo ama guriga xannaaneeyaha xannaano-maalmeedka qoyska.

Xannaano-maalmeedku waxay noqoneysaa booska koriinshaha iyo horumarka qoyska. Sida caadiga ah xannaano-maalmeedku waa lacag, laakiin dakhliga waalidka soo gala ayaa saameyn ku yeelanaya cadada lacagta. Dadka dakhliga yar uu soo galo wax lacag ah lagama qaado. Waalidka waxaa la siin karaa kaalmada guri ku daryeelista carruurta, taas oo laga codsado Kelada. Xannaano-maalmeedka iyo xannaano-maalmeedka qoyska waxaa lagu codsadaa codsiga xannaano-maalmeedka ama foomka elekterikaala ah ee laga helo bogagga internetka ee magaalada, xannaano-maalmeedyada iyo rugaha adeegga. Codsiga waxaa la dhigtaa xannaano-maalmeedka ugu horeysay ee la doonayo.Codsiga waxaa wannaagsan in waqti hore la dhigto, haddii ay suurtagal tahay 4 bilood kahor marka loo baahan yahay xannaaneynta. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xannaano-maalmeedka waxaa ka heleysaa xarunta barbaarin horaadka ee kuugu dhow.

**Waxbarasho-horaadka**

Xannaano-maalmeedka wuxuu cunuggu ku helayaa waxbarasho-horaadka kahor inta uusan iskuulka u wareegin. Dhammaan carruurta 6da sano jira waxay ka qeybgeli karaan waxbarasho-horaad lacag la'aan ah. Waxbarasho-horaadka waxaa lagu qabanqaabiyaa xannaano-maalmeedka ama iskuulka. Waxbarasho-horaadka waxaa la qabanqaabiyaa marka ugu yaraan todobo ciyaal ah oo da'da iskuul-horaadka jira ay codsadaan iskuul-horaadka. Waxbarasho-horaadka wuxuu cunuggu ku baranayaan aqoon iyo xirfad, kuwaas oo iskuulka looga baahan yahay, tusaale ahaan wuxuu barbaranayaa xarfaha iyo nambarada.

**Xannaano-maalmeedka gaarka ah**

Xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay waxaa xannaano maalmeed ay soo saarto shirkad ama jimciyad magaalada ayaana dusha ka ilaalisa islamarkaasna taageerta. Booska xannaano-maalmeedka gaarka ah waxaa toos looga codsadanayaa xannaano-maalmeedka la doonayo. Soo saaraha adeegga ayaa go'aansanaya xulashada cunugga iyo lacagta xannaano-maalmeedka.

Magaaladu waxay xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay ku taageertaan siinta kaalmada xannaano gaarka ah iyo dheeraad degmada. Sidoo kale waalidka mushaarka ku siinaya xannaaneyso gurigooda si ay ilmahooda ugu heyso waxay heli karaan kaalmada daryeelka gaarka ah. Markaas qoyska ayaa ah shaqaaleeyaha waxayna heshiis shaqo la gelayaan xannaaneysada ay doorteen. Kaalmada daryeelka gaarka ah waxaa laga codsadaa KELA:da.

**Adeegga la-talinta carruurta iyo dhalinyarada**
Kastelli, Palokunnankatu 16
- **03 621 4880**
- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Perheiden-palvelut/paivahoito/Yksityinen-paivahoito/**

**Xannaano-maalmeeyda gaarka ah**

Aurinkokumpu
- **www.aurinkokumpu.net**

Xannaano-maalmeed luqada ingiriiska ah
Jaarlin Päiväkodit Oy
- **www.jaarlinpaivakodit.fi**

## 7.3.2 Xannaano-maalmeedyada furan iyo waxqabadka naadiyada

Carruurta guriga lagu xannaaneeyo iyo waalidkood waxay fursad u heli karaa inay la kulmaan waalid kale carruurtooda ay geeyaan si ay ugu cayaaraan xannaano-maalmeedyada iyo naadiyada. Cunuggu wuxuu xannaano-maalmeedka furan la imaanayaa qof weyn oo la socota, qofkaasina wuxuu mas'uul ka yahay cunugga inta hawshu socoto oo dhan. Xannaano-maalmeedka furan ama naadigu ma ahan goob xannaano. Cunuggu wuxuu fursad uu kaga qeybqaato waxqabad la hagayo oo kooxda carruurta loogu sameynayo naadiyada. Waxqabadku inta badan waa lacag.

### Waxqabadka naadiga Kaniisadaha ee carruurta

Kaniisado kala duduwan ayaa waxay carruurta iyo qoysaska carruurta leh u qabanqaabiyaan waxqabad naadiyeed kala duduwan. Adeegyadu dadka oo dhan waa u furan yihiin waana lacag la'aan.

### Ururka badbaadada carruurta ee Mannerheim

Ururka badbaadada carruurta ee Mannerheim wuxuu Hämeenlinna qoysaska carruurta iyo waalidiinta uga qabanqaabiyaa waxqabadyo noocyo badan iyo caawimaadda xannaanada carruurta ee waqti gaaban ah oo guriga lagu siinayo.

**Ururka badbaadada carruurta ee Mannerheim**
Turuntie 24 A 10
- **045 7730 2002**
- **www.hameenlinna.mll.fi**

**Peuhula**
Naadiga maalinta ee jimicsiga oo 2–6 sano jirka loogu talagalay. Naadi maalmeed subax iyo galab ah iyo iskuulka ciyaarta jimicsiga.

**Ururka taageerada jimicsiga carruurta**
Saaristenkatu 13-15
- **03 652 5240**
- **www.lastenliikunnantuki.fi**

**Hämeenlinnan 4 H –yhdistys**
Xannaano-maalmeed furan, waxqabadka jardiinada ciyaarta iyo waxqabadka hiwaayadda ee loogu talagalay dhalinyarada iyo carruurta.

**Hämeenlinnan 4 H –yhdistys**
Vanajantie 10 A
- **050 509 0750**
- **www.hameenlinna.yhdistykset.4h.fi**

### Caawimaadda ku meelgaarka ah ee xannaaneynta carruurta

Adeegga guriga ee qoyska carruurta ee magaalada Hämeenlinna oo waqti gaaban ah, kaalmo iyo caawimaadda xaaladaha kala duduwan ee ku meelgaar ah oo ka dhaceysa guriga qoyska carruurta leh, marka uu qoysku wajaho xasarad nololeed cusub. Kuwaan waxay noqon karaan tusaale ahaan jirashada waalidka, ku jirista cisbitaalka, dhaawacmid, daalid ama xaalad nololeed kale oo adag. Adeegga guriga ee qoyska carruurta leh waa lacag laakiin waxaad codsan kartaa in lagaa cafiyo lacag.

**Adeegga guriga ee qoyska carruurta leh**
Dalabyada telefoonka:
- **03 621 2593**

**Maktabadaha**

Maktabadaha waxaa kale oo carruurta looga qabanqaabiyaa barnaamijyo iyo dhacdooyin badan sida sheeko-xariirada, filimada carruurta iyo gacanta wax ka qabashada. Macluumaadyada rasmiga ah ee maktabadaha: ka fiiri bogga 44.

## 7.3.3 Iskuulka hoose-dhexe

Cunugga dibadda ka soo guuray wuxuu dhigashada iskuulka ka bilaabi karaa fasalka diyaarinta ah ee loogu talagalay carruurta dalka u soo guurtay. Waxbarashada dadka dalka u soo guuray ujeedada laga leeyahay waa in qofka dalka u soo guuray la siiyo diyaarin uu wax uga barto fasalka ku baxaya luqada finnishka. Qofka dalka u soo guuray ee sida rasmiga ah u deggan Finland islamarkaasna ku jira da'ada waajibka waxbarashada (7–16 sano) wuxuu xaq u leeyahay waxbarashada aasaasiga ah ee sida Finnishka caadiga ah oo kale. Da' kasta oo ay jiraan carruurta waxaa loo qabanqaabiyaa barashada luqada finnishka, afkooda hooyo, diintooda iyo haddii loo baahdo kaalmo waxbarasho. Sidoo kale waxaa iyaga lagu kaalmeeyaa in dhaqankooda iyo luqadooda ay heystaan.

**Iska diiwaangelinta iskuulka iyo soo barashada**

Iska diiwaangelinta iskuulka waxaa lagu sameeyaa foom (foomka macluumaadka ardayga). Foomka waxaad ka heleysaa bogagga internetka ee magaalada Hämeenlinna, iskuulaadka, xafiisyada adeegyada waxbarashada ama goobaha adeegga ee magaalada. Foomka la buuxiyay waxaa la geynayaa cinwaanka lagu xusay foomka ama goobta adeegga ee Kastelli. Marka maamulka adeegyada waxbarashu ay cunuggu boos waxbarasho u tilmaamaan, maamulaha iskuulka ayaa la soo xiriiraya waalidka kadibna waalidka iyo cunugga kala ballamaya soo barashada iskuulka.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ama adeeg hagitaan ah kala xiriir Barta adeegga ee Kastelli**
Palokunnankatu 16
- **03 621 4880** (isniin-jimce saacadda 9-16)
- **lanu.palveluohjaus@hameenlinna.fi**

**Waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarasahda aasaasiga ah**

Magaalada Hämeenlinna waxay carruurta dalka u soo guuray ee u dhexeeya 7–16 sano u qabanqaabisaa waxbarashada loogu diyaarinayo iskuulka hoose-dhexe. Waxbarashada diyaarinta ah ardayga dalka u soo guuray waxaa lagu barayaa aqonta aasaasiga ah ee luqada finnishka si uu marka dambe ugu wareegi karoodo waxbarashada guud ama caadiga ah. Hämeenlinna waxaa ka shaqeeya saddex fasal ee diyaarinta dadka dalka u soo guuray. Waxbarashada diyaarinta ah waxay qaadataa 1–2 sano. Tan kadibna ardaygu wuxuu u wareegayaa fasalka heerkiisa ku haboon ee iskuulka ugu dhow. Ardayda da'da iskuulka hoose ku jira waxay waxay ku bartaan iskuulka Jukala kuwa da'da iskuulka dhexana iskuulka Lyseo. Intaas waxaa dheer in Lammi uu ku yaal fasal diyaarin oo u gaar ah. Mudada waxbarashada diyaarinta ah lagu jiro waxaa la cadeynayaa taariikh wabarasheed ardayga iyo waxyaabaha gaarka ah ee uu u baahan karo dhinaca waxbarashada. Macallimadda ama macallinka ayaa waalidka iyo ardayga la dejinaya qorshe waxbarasho. Intaas waxaa dheer kulamo la qabto markii loo baahdo. Kaalmo ahaan waxaa la isticmaalaa turjubaan.

**Waxbarashada diyaarinta ah**

- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Koulut-ja-opetus/Maahanmuuttajaopetus/Valmistava-perusopetus/**



Xarunta dhaqanka ARX ee dhalinyarada iyo carruurta

## 7.3.4 Adeegyada dhalinyarada

### Adeegyada dhalinyarada ee magaalada Hämeenlinna

Adeeygada dhalinyarada ee magaaladu waxay soo saaraan adeegyo hiwaayadeed iyo waxyaabo la qabto xilliga firaaqada sidoo kale waxay kaalmeeyaan ka qeybqaadashada dhalinyarada iyo adeegyada heshiisiinta muranada iyo dembiyada. Waxqabadyada goobaha dhalinyarada waxaa lagu geli karaa kaarka Nuokkari oo laga soo qaato goobta dhalinyarada ee kuugu dhow, kaas oo aad si xornimo ku geli karto dhammaan goobaha dhalinyarada ee Hämeenlinna. Sidoo kale waxaad kaarkaas ku heleysaa qiimaha dhimista safar maalmeedyada ay adeegyada dhalinyaradu qabanqaabiyaan iyo waxqabadyada kale. Goobaha dhalinyarada waxaad ku ciyaari kartaa bilyaardi, ku dhegeysan kartaa muusikada, ku fiirsan kartaa filimo, ku baran kartaa waxyaabaha gacanta laga qabto oo badan, saaxiib ayaad kula kulmi kartaa dad cusubna waad bareynsaa. Goobaha dhalinyaradu qeybo badan ayeey magaalad auga yaalaan. Bogagga internetka ee adeegyada dhalinyarada ayaad ka heleysaa meelaha ay goobuhu ku yaalaan.

- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Nuoret**

### Xarunta dhaqanka ARX ee dhalinyarada iyo carruurta

ARX waa saldhigga sameeyayaasha iyo isticmaalayaasha dhaqanka carruurta ee Hämeenlinna. Waxqabadyada ARX carruurta iyo dhalinyaradu waxay uga qeybqaadan karaan tusaale ahaan foosooyin shaqo, bandhigyo, dhacdooyin iyo bandhigyo. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa bogagga internetka ee ARX.

**Xarunta dhaqanka ARX ee dhalinyarada iyo carruurta**
Keinusaarentie 1
(daarta ARX)
- **arx.hameenlinna.fi**

### Shaqada dhalinyarada dhaqamada badan ee Setlementti, Hämeenlinna

Ururka Setlementti wuxuu Hämeenlinnaugu fidiyaa dhalinayarada dhaqamada badan waxqabadyo kala duduwan sida waxqabad-kooxeed, leyriyo, safar maalmeedyo, kaalmada shaqada guriga, dhacdooyin iyo hagisyo howaayadeedka waqtiyada firaaqada, horumarinta aqoontooda, safar maalmeedyada iyo waxqabadyada iskaada ah (macluumaadyad xiriirka bogga 44).

## 7.4 Jimicsiga iyo isboortiga

Hämeenlinna waxaad ku sameynta kartaa hiwaayad dhinacyo badan. Hämenlinna waxaa ka jira jimciyado badan oo dhinaca isboortiga iyo jimicsiga ah, xarumo jimicsi iyo hoolal jimicsi. Intaas waxaa dheer oo magaalada ku yaal laba hool dabbaaleed oo qeybahooda jimicsiga wata iyo soonayaal badan oo loo socod tago, kuwaas oo si xornimo ah loogu socon karo looguna hiihteyn karo. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jimicsiga waxaad ka heleysaa marka aad la xiriirto xafiiska Sirkadda Hoolasha jimicsiga Hämeenlinna dhismaha bulshada ee magaalada Hämeenlinna iyo la socoshada ogeysiisyada jaraa'idyada.

Shirkadda hoolalka ee magaalada Hämeenlinna waxaad weydiin kartaa kireysashada boosaska jimicsiyada gudaha iyo garoonada dibadda ee waaweyn:

**Shirkadda hoolalka jimicsiga ee Hämeenlinna**
Kiekkoritarinkuja 3A,
toimisto@hmlliikuntahallit.fi
**• 03 621 2558**
**• www.hmlliikuntahallit.fi**

**Hoolka dabbaasha ee Hämeenlinna**
Uimarintie 2
**• 03 621 2428**

**Hoolka dabbaasha ee Lammi**
Lamminraitti 37
**• 040 455 7045**

Goobaha ciyaaraha, garoonada jidadka bannaanka ee loo socod tago waxaa mas'uul ka ah soosaaraha adeegga ee dhismaha bulshada magaalada Hämeenlinna.

**Nambarka adeegga macaamiisha**
**• 03 621 3500**
info.yhdyskuntarakenne@hameenlinna.fi

# 8 WAXQABADKA DHAQAMADA BADAN

## 8.1 Shaqada dhaqamada kala duwan ee magaalada Hämeenlinna

Shaqada dhaqmada kala duwan waxaa lagu qabtaa Kumppanuustalo waxayna meelo ay wax ku qabsadaan siisaa guruubada dhaqamada kala duwan leh iyo ururada. Kumppanuustaloda waxaa lagu qabtaa naadiyaal luqada finnishka ah, waxqabadyo iyo kooxaha waqtiyada firaaqada. Ujeedada laga leeyahay hawsha dhaqanka badan waa in la horumariyo fahamka dhaqamada kala duduwan, kaalmeynta sii waarista dadka dalka u soo guuray dhaqankooda iyo abuurista fursado uu qofku si la siman sida dadka magaalada deggan uu wax u qabsan karo.

**Caawimaadda bulshada**

Caawimaadda bulshada waad codsan kartaa haddii aad qabanqaabineyso dhacdo kaalmeyneysa dhaqankaada iyo/ama la-qabsashada Hämeenlinna. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga helayaa xafiiska Adeegyada dadka dalka u soo guuray ama hagaha dhaqamada badan.

**Shaqada dhaqamada kala duwan ee magaalada Hämeenlinna**
Kumppanuustalo
Kirjastokatu 1
Hagaha dhaqamada kala duwan
**03 621 2560**
- **www.hameenlinna.fi/maahanmuutto**

## 8.2 Xarumaha xaafadaha

Hämeenlinna waxaa ku taal laba xarun xaafadeed. Waxaad iyaga kula kulmi kartaa dad kale, kafateerigooda tegi kartaa, jaraa'id ku aqrin kartaa, waxbaad ku koobiyeysan kartaa kambuyuutarna ku isticmaali kartaa. Waxqabadyo dhinacyo badan ayaa waxaa lagu qabanqaabiyaa xarumaha xaafadaha waxaadna uga qeybqaadan kartaa kooxaha hiwaayadaha ee naadiyada kala duduwan sida luqada, gacanta wax ka sameynta, shaqo gacmeedka iyo kooxhaha jimicsiga, koorasyada, dhacdooyinka iyo socod maalmeedyada. Kalandarka waxqabadka ee xarumaha xaafadaha waxaad ka heleysaa xarumaha xaafadaha, kastelli ama internetka.

- **lahiokeskus.fi**

**Xarunta xaafadaha bariga ee Katuma**
Kanervatie 1
- **045 7731 2017**

**Xarunta xaafadaha galbeedka ee Nummi**
Sammontie 4
- **045 7731 2018**

## 8.3 Dhaqamada badan ee Kaarisiltakeskus, ururka Setlementti ee aagga Hämeenlinna

Ururka Setlementti ee Hämeenlinna oo ururu dhaqamo badan waxaana ku jiro xubno Finnish iyo dad wadamo kala duduwan ka soo guuray isugu jira. Setlementti wuxuu qabanqaabiyaa kooxo kala duduwan, dhacdooyin, munaasabado waxbarasho iyo xaflado oo aad ka qeybqaadan karto. Tusaale ahaan waxqabadyo hiwaayadeed gabdhaha iyo wiilashaba loogu talagalay, waxqabadyo maalmeed, waxqabadyada waqtiga fasaxa iskuulka, kaalmada shaqada guriga. Kaarisiltakeskus waa goobta kulanka dhaqamada badan ee Setlementti, halkaas oo aad kaalmo iyo hagisba uga helo

wax kasta oo la xiriira arrimaha nolosha dadka dalka u soo guuray sida buuxinta foomamka iyo barashada luqada finnishka. Kambuyuutar ayaa macaamiisha u yaal meeshaas. Setlementti waxaa laga heli karaa kaalmo iyo caawimaad uu bixinayo mutadawac ee dadka dalka u soo guuray iyo qoyska dhaqamada badan ama xubinta qoyskooda loogu talagalay.

**Ururka setlementti ee aagga Hämeenlinna**
Kirjastokatu 1
- **050 3269146**
- **www.hmlsetlementti.net**

## 8.4 Maktabadaha

Hämeenlinna waxaa ku yaal saddex maktabadood: Maktabadda dhexe, maktabadda Tuomela, maktabadda Jukola iyo maktabadaha xaafadaha. Maktabadaha waxaa laga helaa buugaag ku qoran luqado kala duduwan. Waxaad sidoo kale shaqaalaha maktabadda ka codsan kartaa in uu kuu dalbo buugaag ku qoran afkaada hooyo. Qof kasta wuxuu maktabadda ku isticmaali karaa lacag la'aan marka uu heysto kaarka maktabadda. Sarkaalka maktabadda ama maktabadda kuugu dhow ayaad ka heli kartaa kaarka maktabadda.

**Maktabadda dhexe ee Hämeenlinna**
Lukiokatu 2, 13100 Hämeenlinna
- **03 621 2598**

**Maktabadda Jukola**
Eeronkuja 5, 13500 Hämeenlinna
- **03 621 3468**



# 9. DIINTA

Finland waxaa ka jira xornimo diimeed. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu qaato islamarkaasna ku cibaadeysto diintiisa, waxaa kale oo uu xaq u leeyahay in uu muujiyo caqiidadiisa. Dadka Finnishka ah 90 % waa Kirishtan. Kaniisada shacabka ee ugu waaweyn Finland waa kaniisadda efangeli-luteeriga iyo tan ortodoksiga. kaniisadda Efangeli-luteeriga waxaa ka mid ah qiyaastii 80 % dadka Finnishka ah kaniisadda Ortodoksiga waxaa kamid ah qiyaastii 1,1 % dadjka Finnishka ah. 1,3 % dadka Finnishka ah waxay xubin ka yihiim isu tagyada diimeed ee diiwaangashay, kuwaas oo ay ugu waaweyn yihiin rumeeyayaasha Jehova, kaniisadda xorta ah ee Finland, Kaniisadda katooliga ee Finland, Kaniisadda Adventti ee Finland iyo kaniisadda helluntai ee Finland. Intaas waxaa dheer in Finland ay ka jiraan diimo kale sida Islaamka, juhuudnimada, budhanimadaiyo Hinduuga.

## 9.1. Kaniisadda efangeli-luteeriga ee Hämeenlinna-Vanaja

Waxaa lagu cibaadeysaa Axad kasta saacadda 10.00 kaniisadda Hämeenlinna iyo tan Vanaja iyo saacadda 12.00 oo lagu cibaadeyso kaniisadda Hätilä iyoJ Guriga shimbirta ee Jukola. Kaniisaddu waxay waxqabadyo u qabanqaabisaa da'yaasha kala duwan dadka jira: waxqabadyo naadi, waxqabad muusik iyo kooxo yaryar oo kala duduwan iyo munaasabado kale. Jaraa'idka guriga kaniisadda ee guri kasta la geeyo waxaa sidoo kale laga aqrisan karaa internetka.

**Xafiiska Diiwaanka kaniisadda**
Rauhankatu 14
• **03 62 641**
Baadariga heeganka ah
• **040 804 9330**
• **www.hameenlinna-evl.fi**

**Shaqada dhaqamada badan ee Diakoni**
Diakonissa Tiina Kröger
• **040 804 9359**
tiina.kroger@evl.fi

## 9.2 Kaniisadda ortodoksiga ee Hämeenlinna

**Orthodox Church**

Cibaadeysiga joogtada ah waa Sabti kasta saacadda 17.00, Vigilia iyo Axad kasta saacadda 10.00 Liturgia iyo adeegyada maalmaha xafladaha ee gaark ah. Axadda ugu dambeysa bisha liturgia wuxuu ku baxaa laba luqadood (finnish-slaavi/ruush). Waxyaabaha kale ee la qabto waxaa kamid ah waxqabadka jiibiska, shaqada dhalinyarada, carruurta iyo qoyska, ururka diakoni, wareegga ikkoni, ururka talaada, naadiga Kyyrölä, wareegga ortodoksiga ee luqada ruushka. Jaraa'idka kaniisadda Analogi wuxuu sidoo kale ka soo baxaa cinwaanka www.ort.fi/analogi.

**Xafiiska Diiwaanka kaniisadda**
Matti Alangonkatu 11
Talaado, Arbaco iyo Jimco saacadda 9.30–12.00
• **03 616 5228**
hameenlinna@ort.fi
• **www.ort.fi/hameenlinna**

**Baadari**
Markku Aroma
• **03 612 5229**

**Kaniisadda Ortodoksiga**
Erottajakatu 2

**Kaniisadda xagaaga ee Ahvenisto**
Waxay ka soo horjeedaa Cusbitaalka dhexe

## 9.3 Kaniisadda katooliga ee Tampere, kaniisadda mucatabka barakeysan

**Catholic Church, The Holy Cross Parish Tampere**

Isku imaatinka waxaa Hämeenlinna lagu qabtaa Axadda ugu horeysa bil kasta saacadda 15.00 (Hoolka Kaniisadda ortodoksiga, Matti Alangon katu 11 A, 13130 Hämeenlinna). Kaniisadda Tampere, isku imaatinka luqada finnishku wuxuu ka dhacaa Axad kasta saacadda 10.30, kan luqada ingiriiskana saacadda 18.00.

Amurinkuja 21, 33230 Tampere
• **http://risti@catholic.fi**

**Baadari** Zenon Strykowski
• **03 212 7280**

## 9.4 Kaniisadda xorta ah ee Hämeenlinna

**The Evangelical Free Church**

Cibaadeysa Axad kasta saacadda 16.00, markaasna waxaa carruurta u jira iskuul diimeed. Noocyada kale ee waxqabad waxaa kamid ah, koorasyada Alfa, shaqada kaalamda cuntada ee Miwodga Yurub, waxqabadka lamaanaha, goobaha dhalinyarada, qolal guriyeedyo, International Fellowship iyo waqabadyo kale oo badan oo loogu talagalay dadka da' ahaan kala duduwan. Kaniisadda xorta ah waxay ku shaqeysaa saddex goobood; Sibeliuksenkatu 17, Katumantie 25 iyo Littala Koulutie 39.

Sibeliuksenkatu 17
• **03 682 1209**
hameenlinna@svk.fi
• **www.hmlvapis.fi**
Waddaad Arto Kortemaa
• **0400 518300**
arto.kortemaa@svk.fi

## 9.5 Kaniisadda Heluntai ee Saalem

**Pentecostel Church Saalem**

Dhacdada ugu weyn ee todobaadku waa Axad kasta saacadda 11.00 tukashada Eraygu ha ku dhaqaajiyo. Talaado kasta saacadda 19.00 fiidka tukashada erayga. Waxa aintaas dheeraad ah waxqabadyada iyo dhacdooyinka carruurta, dhalinyarada yaryar, dhalinyarada iyo waalidka. Jbbiska dhaqamada badan iyo kooxda bandiga iyo tukashooyinka dhaqamada kala duduwan.

Turuntie 12
Xafiisku wuxuu furan yahay Talaado saacadda 16–18
Arboco- Khamiis saacadda 10–12
• **03 6822 233**
info@saalem.net
• **www.saalem.net**

Waddaad Onni Haapala
• **044 5504 163**
Waddaadka Diakoniai Jukka Nieminen
• **0400 920 363**

## 9.6 Kaniisadda Adventti ee Hämeenlinna

**Seventh-day Adventist Church**

Tukashada Sabti kasta saacadda 10.00. Goobta huudheyda ee adeegga caawimaaddu wuxuu furan yahay Talaado kasta saacadda 17.00–19.00, markaas oo la heli karo caaimaadda cuntada Midowga Yurub.

Tykistötie 13
- **03 6169 655**
- **www.adventtikirkko.fi/hml**

**Mas'uulka shaqada caawimaadda**
Birgit Jensen–Kannisto
- **040 5677710**

## 9.7 Islaam

**Ururka Golaha Islaamka Finland**

Ujeedada Golaha (SINE) laga leeyahay waa in uu bulshada Ismaamka Finland u noqdo golaha wadashaqeynta iyo kulamada wada sheekeysiga. Goluhu wuxuu u metalaa ururada xubnaha ka ah wadahadalka lala gelo hay'adaha dowladda iyo ururo diimeedyada kale.

**Golaha Islaamka Finland (SINE) ry**
Apollonkatu 10 B 82, Helsinki
- **09 458 7386**

sine@sine.fi
- **www.sine.fi**

## 9.8 Budhiistanimada

**Watbuddharama Finland**
Aallokontie 25, Nurmijärvi
- **09 726 3721**
- **040 832 1009**

mahanual@hotmail.com
- **www.watbuddharama.net**

# 10. KELA

Waaxda hawlgabka dadka, Kelada waxay bixisaa ammaanka bulshada ee xaaladaha nololeed ee kala duduwan. Ka mid ahaanshaha wareegga ama xeyndaabka ammaanka bulshad waxaa la codsan karaa marka la doonayo in joogto loo joogo Finland. Macluumaadyo dheeraad ah oo ku saabsan manfacyada Kelada waxaad ka heleysaa xafiiska Kelada ee kuugu dhow ama bogagga internetka ee Kelada.

**KELA**
Rauhankatu 1
• **www.kela.fi**
Nambarada adeegyada hoose ee kala duduwan

Kela

## 10.1. Tusaalooyinka manfacyda Kelada

Ammaanka bulshada waxaad ku heli kartaa xaalado nololeedyo kala duduwan waana in foom lagu codsadaa. Kelada ayaa qiimeyneysa manfacyada aad xaqa u leedahay inaad heshoo.

• Kaalmada hooyonimada: Haddii aad tagtay koontaroolka caafimaad kahor bisha 5aad ee uurka, waxaad heli kartaa dharka dhallaanka iyo qalabka xannaaneynta. Kaalmada hooyanimada waxaa loo heli karaa lacag ahaan.
• Lacagta hooyonimada iyo waalidka: Marka aad cunug dhasho waxaad xaq u leedahay inaad hesho lacagta hooyonimada haddii aad deganeyd Finland ugu yaraan 180 maalmood kahor marka loo qabtay dhalistaada.
• Kaalmada daryeelka guriga cunuggu waa lacag aad heleyso marka aad guriga ku xannaaneyso cunug ka yar 3 sano.
• Dheeraad cunugga waa lacag bil kasta oo la siiyo mas'uulka cunugga ka yar 17 sano.
• Kaalmada waxbarashadu waa lacag aad codsan karto marka aad wax ka baraneyso dugsiga sare, iskuulka xirfadda, iskuul xirfadeedka sare iyo jaamacadda.
• Kaalmada kirada waxaa loo bixiyaa in kirada la isaga bixiyo. Cadada kaalmada kiradu waxay ku xirantahay kirada, tirada dadka guriga deggan iyo dakhligooda. Kaalmada kiradu waxay dabooshaa qeyb ahaan qarashka.
• Ammaanka shaqo la'aanta: Haddii aadan shaqo heysan waxaad heli kartaa ammaanka shaqo la'aanta. Waa in aad xafiiska shaqada isaga diiwaangelisaa shaqo laawe shaqo doon ah.
• Lacag maalmeedka jirada: Haddii aad jiran tahay oo aadan shaqada aadi karin ama aad shaqo la'aan tahay waxaad xaq u yeelan kartaa lacag maalmeedka jirada.
• Baxnaanada: Waxaad dhaqaale ahaan u codsan kartaa qarashka baxnaanada haddii aada si daran u jiran tahay ama aad naafo u noqotay.
• Hawlgab: Dadka ka weyn 65 sano waxay Finland ku helaan hawlgab. Hawlgabka waxaa kale oo heli kara qofka jiran ee aan dib dambe u awoodin in uu shaqo qabto. Ogolaanshaha hawlgabka iyo baaxaddiisaba waxaa saameyn ku leh inta la deganaa Finland, in shaqo Finland uu qofku ku sameeyay iyo in uu ka helo qofku ka helo dibadda hawlgab. Dadka ka yar 65 sano xitaa sababo gaar ah ayeey ku heli karaan hawlgabka.

## 10.2 Nambarada adeegga wadanka ee Kelada

Nambarada adeeggu waxay adeegaan Isniinta-Jimco saacadda 8.00–18.00
**Weydiinta maalinta lacag bixinta: 020 634 0210**
Lacagta dheeraadka cunugga, kaalmada daryeelka carruurta, hawlgabka iyo manfacyada naafada, kaalmada kirada, kaalmada waxbarashada iyo kaalmada askarta maalinta la bixinayo waxaad weydiin kartaa adeegga telefoonka ee awtimaatikada ah. Adeeggu waxaa la isticmaali karaa maalinta kasta 24ka saac.

| | |
|---|---|
| **Kaalmooyinka waajibaadka qaranka** | |
| Kaalmada askeri iyo kaalmooyinka kale ee waajibaadka ciidamada | 020 692 200 |
| **Kaalmada kirada** | |
| Kaalmada kirada ee guud | 020 692 201 |
| **Arrimaha hawlgabka** | |
| Hawlgabka shacabka, hawlgabka shaqada, kaalmada kirada ee qofka hawlgabka qaata | 020 692 202 |
| **Kaarka Kelada iyo kaarka caymiska caafimaadka ee Midowga Yurub Kela** | |
| Dalabyada kaarka Kelada iyo kaarka caafimaadka caymiska ee Midowga Yurub | 020 692 203 |
| **Baxnaanada** | |
| Adeegyada baxnaanada iyo koorsyada, lacagta baxnaanada | 020 692 205 |
| **Kaalmooyinka qoysaska carruurta leh** | |
| Lacagaha waalidka, dheeraadka cunugga, kaalmada masruufka iyo kaalmooyinka kale ee qoyska ilmaha heysta (Ogeysiis: Arrimaha lacagta daryeelka gaarka ah ka wac nambarka adeegga Jirashada) | 020 692 206 |
| **U soo guurista iyo ka guurista dalka** | |
| Ammaanka bulshada ee dibadda ama marka loo soo guuro Finland | 020 692 207 |
| **Marka ehelku dhinto** | |
| Hawgabka qofka laga dhintay, hawlgabka qoyska | 020 692 208 |
| **Kaalmooyinka ardayga** | |
| Lacagta waxbarashada, dheeraadka degista, damaanad qaadka dowladda ee kaalmada waxbarashada, kaalmada dulsaarka, kaalmada safarka iskuulka | 020 692 209 |
| **Jirashada** | |
| Magdhawyada daryeelka jirada, magdhawga daawada, lacag maalmeedka jirada iyo lacagta daryeelka gaarka ah | 020 692 204 |
| **Kaalmooyinka waqtiga shaqo la'aanta** | |
| Kaalmada suuqa shaqada, lacag maalmeedka aasaasiga ah, kaalmooyinka waqtiga tababarka ee qofka shaqo la'aanta ah | 020 692 210 |
| **Kaalmooyinka naafada** | |
| Kaalmooyinka naafada, kaalmada daryeelka ee qofka hela hawlgabka, magdhawga keliyaakada | 020 692 211 |
| **Ka soo wicista dibadda** | |
| Haddii aad ka soo waceyso dibadda marka hore dooro +358 kadibna nambarka deegga ee aad dooneyso oo aan laheyn eberta hore. Tusaale ahaan kaalmooyinka waajibka ciidanka | +358 20 692 200. |

# 11. CAAWIMAADDA MARKA LAGU JIRO XAALADO XASARADEED

## 11.1. Gargaarka degdegga ah iyo xaalad halis ah

Xaalad nafta halis gelineysa marka lagu jiro waxaa qasab ah in la waco xarunta degga

Nambarka halista ee Finland 112

## 11.2. Caafimaadka dhimirka

Ciriiyoonaan, isku buuqis ama xaalad nololeed xasarad leh marka lagu jiro waxaa lala xiriiri karaa kalkaalisada caafimaadka ee qeybta waalidda ee rugta caafimaadka.

**Kalkaaliyayaasha caafimaadka ee xaqga cudurada dhimirka**
Qofka macaamilka ah ayaa waqtiga ka qabsanaya rugtiisa caafimaadka maaalmaha shaqada saacadaha u dhexeeya 11-12.
- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Sosiaalipalvelut/Mielenterveys-ja-henkisen-hyvinvoinnin-palvelut/**

## 11.3. Adeegyada maandooriyaha

Dhibaatooyinka maandooriyaha waxaad caawimaad uga heleysaa Kilinikada A. Adeegyadu waa lacag la'aan. Kalkaaliso caafimaad ama shaqaale sooshaal ayaa macaamilka la kulmaya ballan la'aan maalmaha shaqada saacadda 8.00–10.00

**Waxqabadka Kilinikada A ee Hämeenlinna**
Viipurintie 1–3 D dabaqa 3aad.
- **03 621 2400**

Heeganka telefoonka Isniin-Jimco saacadda 11.00–12.00
- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Sosiaalipalvelut/Paihdepalvelut/**

**Ururka Sininauha ee Häme**
Ururka Sininauha wuxuu caawimaad iyo kaalmaba u fidiyaa nolosha dadka qaba dhibaatooyinka maandooriyaha iyo kuwa halista faquuqa ku hoos nool. Ururka Sininauha wuxuu fidiyaa shaqo waxqabad, waxqabadka xarun maalmeedka, degista guryaha ee kaalmada leh, talo-siin dhaqaale iyo qeybinta cuntada caawimaadda.

**Ururka Sininauha ee Häme**
Markkulantie 3 A
- **044 282 1403** (Huudheydfa Kauratie)
- **050 461 2700** (Sinitori)
- **0400 474 097** (Aake Huurresalo)

aake.huurresalo@sininauha.com
- **www.sininauha.com**

## 11.4. Living room

Living room waa goobta hoose ee talo-siinta caafimaadka iyo tijaabada ee loogu talagalay dadka daroogada isticmaala. Living room waa goobta hoose ee talo-siinta caafimaadka iyo tijaabada ee loogu talagalay dadka daroogada isticmaala. Waa la joogi karaa, jaraa'id öagu aqrisan karaa, lagu qubeysan karaa dharkana waa lagu dhaqan karaa. Arrimo ka sameysashada living room waxay ku dhacdaa calaamad magac waana lacag la'aan.

**Living Room**
Waxqabadka Kilinikada A ee Hämeenlinna
Birger Jaarlinkatu 21 B 36, 13100 Hämeenlinna
- **03 6213366**
- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Sosiaalipalvelut/Paihdepalvelut/**

## 11.5. Talo-siinta dhaqaalaha iyo deynta

Talo-siinta dhaqaalaha iyo deynta waxaa laga helaa caawimaad haddii ay jiraan dhibaatooyin dhinaca isticmaalka lacagta ah ama deymo uusan qofku iska bixin karin.

Talo-siinta dhaqaalaha iyo deyntu waa lacag la'aan. Waqtiga soo wicista waqti ballan ayaa u qabsan kartaa.

**Talo-siinta dhaqaalaha iyo deynta**
**• 03 621 2765, 03 621 2763**
Waqtiga telefoonku waa Isniin-Jimco saacadda 13.00–14.00

Booqashada macaamilku waxay ku dhacdaan ballan kaliya.
**• www.hameenlinna.fi/Palvelut/Sosiaalipalvelut/Talous--ja-velkaneuvonta/**

## 11.6 Xafiiska caawimaadda sharciga

Xafiiska caawimaadda sharcigu wuxuu shaqsiyaadka gaarka ah oo dhan ka caawiyaa arrimaha la xiriira sharciga. Xafiisku wuxuu adeegaa reer Hämeenlinna iyo degmooyinka ku wareegsan dadka deggan.

**Xafiiska caawimaadda sharciga**
Sibeliuksenkatu 21
**• 029 56 60620**
**• www.oikeus.fi**

## 11.7 Heeganka dhibanaha dembiga

Haddii adiga ama ehelkaada uu noqday dhibane dembi ama marqaati, waxaad la xiriiri kartaa Heeganka dhibanaha dembiga. Halkaas waxaad ka heleysaa caawimaadyo iyo la talin ku aadan sida aad xaaladdaas wax uga qabaneyso.

**Barta adeega ee Kanta-Häme**
Suomen kasarmi 2, 13100 HÄMEENLINNA
**• 050 378 2877**
**• www.riku.fi**

RIKOSUHRIPÄIVYSTYS

## 11.8 Dhacdada geerida

Marka dhimasho timaado la xiriir kaniisada marxuumka si loogu helo booska xabaasha. Habeynta aaska waxaa inta badan sameeya xafiiska aaska ee gaarka ah. Si loo cadeeyo hantida marxuumka la xiriir qareen ama xafiiska caawimaadda sharciga. Kaalmada dhaqaale ee kharashka aaska waxaa la weydiin karaa xafiiska sooshaalka. Haddii la doonayo in marxuumka ama marxuumadda loo qaadayo wadankiisi si loogu aaso, la xiriir safaaradda dalkaada. Xusuuso inaad ruqseyso heshiisyadi meydka (tusaale ahaan telefoonka, korontada iyo internetka), ka saar heshiiski kirada guriga, gurigana banee. Faarujinta guriga waxaad kaalmo uga heli kartaa tusaale ahaan Ururka Sininauha ama mu'asasada Luotsi.

**Ururka Sininauha**
**• www.sininauha.com**
**Mu'asasada Luotsi**
**• www.luotsisaatio.fi**

# 12. ADEEGYADA KALE

## 12.1 Huudheyada

Huudheyada waxaad ka heli kartaa qalabka guryahay oo la isticmaalay ee raqiis ah. dhar iyo maacuun.

**Huudheyda weyn ee Hämeenlinna**
Keksikatu 5, 13110 Hämeenlinna
• **03 688 1661**

**Xarunta dib u isticmaalka**
Aulangontie 1, 13210 Hämeenlinna
• **03 687 6312**

**Kirpputori Herman´s Second Hand**
Brahenkatu 27, 13100 Hämeenlinna
• **03 616 6330**

**Huudheyada Fida**
Raatihuoneenkatu 8,
13100 Hämeenlinna
• **03 612 0898**

**Huudheyda ururka Sininauha**
Kauratie 2, 13130 Hämeenlinna
• **03 653 7311**

**Sinitori**
Markkulantie 3, 13100 Hämeenlinna
• **03 656 180**

## 12.2 Dhaqtarka xoolaha

Hämeenlinna waxaa ku taal saddex qaabilaadda dhaqtarka xoolaha ah, kuwaas oo lagu daweeyo xayawaanada yaryar. Qaabilaadda waxaa kale oo laga sameeyay booqashooyinka xayawaanada waaweyn ee jooga beeraha iyo xeryaha, waxaa kale oo lagu sameeyaa heeganka dhaqtarka xoolaha.

**Qaabilaadda xayawaanka yaryar ee Kanta-Häme,**
dhaqaatiirka xoolaha ee degmada,
Hongistonkuja 8 (Jukola)
• **03 621 3757**

**Nambarka telefoonka heeganka ee waqtiyada** shaqada ka baxsan
• **03 621 3757**.
Ballanta waqtiga ee maalmaha shaqada saacadda 8.00–9.30
• **www.hameenlinna.fi/elainlaakari**

## 12.3 Farmashiyayaasha

Farmashiyayaashu waxay si caadi ah u furan yihiin waqtiyada ay dukaamadu furan yihiin, xaaladaha degdegga ah dartoodse hal farmashiye ayaa todobaad kaltan ahaan waqti ka dheer waqtiyada furiinka furan. Farmashiyayaasha heeganku waa:

**Farmashiyaha suuqa Hämeenlinna**
Hallituskatu 18
• **03 630 600**
Wuxuu furan yahay Isniin- Axad saacadda 8–21
• **www.toriapteekki.fi**

**Farmashiyaha Bartamaha magaalada**
Raatihuoneenkatu 8
• **03 682 3631**
Isniin-Jimco saacadda 8–20, Sabti 9–16
• **www.keskusapteekki.fi**

**Farmashiyaha Raatihuone**
Sibeliuksenkatu 3
• **03 682 2018**
Isniin-Jimco 8.30–18, Sabti- Axad 10–18
• **www.raatihuoneenapteekki.fi**

Farmashiyaha aan heeganka gelin:
**Farmashiyaha Kauriala**
Turuntie 4-6
• **03 682 4400**
Wuxuu furan yahay Isniin-Jimco 8.30–19, Sabti 9–14 iyo Luulyo Isniin-Jimco 8.30–18, Sabti 9–14
• **www.kaurialanapteekki.fi**

## 12.4 Turjumista iyo turjumaadda

Sida sharcigu qabo macaamilku turjumis ayuu xaq u leeyahay marka uu arrimo ka fushanayo saraakiisha. Turjubaanku ama af-naqaha shaqadiisu waa turjumidda xaaladda lagu jiro hadalada la iska weydaarsanayo, laakiin sidii caawiye ama qareenka oo kale uma shaqeyn karo. Af-naquhu markasta dhinacna lama jiro waxaana saaran waajibka ka aamusnaanta arrinta.

Turjubaanada iyo af-naqayaasha waxaad ka dalban kartaa xrumaha turjubaanada ama shirkadaha gaarka loo leeyahay. Turjubaanka waa in markasta la dalbadaa iyadoo la soo marayo shirkadaha turjubaanada. Waxaa wannaagsan in waqti fiican kahor la sii dalbadaa turjubaanka si loo helo. Dhinaca luqadaha gaarka ah waqti hore. Marka la dalabka la sameynayo xarunta turjumistu wuxuu u baahan yahay macluumaad luqada laga hadlayo (maanka ku haay xitaa lahjadda), magaca iyo nambarka telefoonka ee ballamiyaha, maalinta turjumista, waqtiga iyo mowduuca dhacdada iyo cinwaanka qaansheegashada. Haddii xaaladda ay la xiriiraan dokumentiyaal warqadeed badan waxaa wannaagsan in turjubaanka horay loogu sii diro si uu u sii aqristo. Degdeg ula xiriir shirkadda turjubaanada haddii waqtiga la qabsaday uu bedelmay ama baaqday. Turjumista dokumentiyada marka aad dalbaneyso telefoon ku ogeysii ama boosto luqada aad dooneyso in laguugu turjumo, mowduuca shaqada turjumista iyo tirada bogagga, taariikhda aad dooneyso in shaqado ay diyaar ahaato, macluumaadka xiriirkaada iyo cinwaanka qaansheegadka, kuna dir dokumentiga la turjumayo boostada ama habkii kale ee la isku afgarto.

Qiimaha turjubaanku wuxuu ku xiranyahay hadba luuqada la turjumayo iyo xafiiska wax turjumaya qiyaastiina waa 62-120 yuuro/saacaddii iyo .. canshuurta iibka 24%. Qiimaha turjumista qoraalka ah waa qiyaastii 60–80 yuuro/boggii.

**Macluumaadyada xiriirka iyo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan noocyadooda luqadaha iyo adeegyada waxaad ka heleysaa internetka iyo bogagga magaalada. Shirkadaha gaarka ah ee sameeya turjumista qoraalka ah waxaad iyagana ka heleysaa internetka.**

# 13. WARAR GUUD

## 13.1 Xuquuqda codeynta ajnabiga ee Finland

Doorashooyinka degmooyinka xaqa codeynta waxaa iska leh ajnabiga guri-degmo ku lahaa Finland mudo labo sano ah (Sharciga demooyinka 26 §) iyo muwaadinka u dhashay Midowga Yurub dowladaha xubinta ka ah, Iceland iyo Norway kaas oo buuxiyay 18 sano islamarkaasna guri-degmadiisu sida macluumaadka nidaamka diiwaangelinta dadku ku xusan ay aheymaalinta 51aad ee maalinta doorashadu dhamaaneysa maalinta ka horeysa. Tikidhada codeynta waxaa boostada loogu diraan guryaha.

Doorashooyinka baarlamaanka Yurub waxaa xaq u leh in uu codkiisa ka dhiibto muwaadinka dowladda xubinta ka ah Midowga Yurub, kaas oo buuxshay 18 sano islamarkaasna Finland ku leh guri-degmo oo waafaqsan sharciga degmooyinka (1994/201), haddii uusan horay u lumin xaqiisa codeyn ee baarlamaanka Midowga Yurub ee dowladda uu muwaadinkeeda yahay (sharciga doorashada 2 §).

Doorashooyinka baarlamaanka iyo doorashooyinka madaxweynaha waxaa codkooda ka dhiiban kara muwaadiniinta Finland ee 18 sano buuxiyay.

## 13.2 Codsashada dhalashada Finland

Ajnabigu wuxuu codsan karaa dhalashada Finland haddii uu Finland deganaa waqti ku filan oo dheer. Marka la codsasnayo dhalashada Finland waxaa qasab ah in la cadeeyo aqoonsiga qofka, waqtiga Finland la deganaa, meesha nolosho ka soo gasho iyo aqoonta luqadeed ee finnishka, iswidishka ama luqada dhegoolaha. Aqoonta luqadeed waxaa lagu muujin karaa tusaale ahaan iyadoo la gelayaa imtixaanka luqada ee guud (fiiri bogga 30) ama shahaadada iskuulka Finland.

Codsiga dhalashada waxaa lagu sameeyaa foomka Xafiiska dal u soo guurista. Foomkan waxaad ka heleysaa booliska degmadaada. Codsiga waa in si shaqsi ah loo dhigaa booliska degmada uu qofku deggan yahay. Horay u sii qaado aqoonsigaada. Go'aanka dhalashadu waa lacag. Lacagta waa in horay loo sii bixiyaa islamarka la dhigayo codsiga si looga baaraandego.

Bogagga internetka ee Xafiiska dal u soo guurista waxaad kia heleysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha la isaga baahan yahay iyo faylka codsiyada dhalashadu meesha ay marayaan.

**Xafiiska dal u soo guurista**
Lautatarhankatu 10, Helsinki
- **0295 419 600**
- **www.migri.fi**

## 13.3 Waajibka ciidan ee ajnabiga jooga Finland

Waajibka ciidanku wuxuu quseeyaa oo kalo ah muwaadiniinta Finland. Qofka jinsiyadaha badan waxaa u suurtagal ah in laga cafiyo fulinta waajibka ciidanka. Helitaanka dhalashada dal kale waa in la ogeysiiyaa ciidamada gaar ahaan marka lagu jiro da'da waajibka ciidanka haddii dibadda la joogana waxaa la ogeysiinayaa safaaradda Finland. Dibadda waxaa sameeya xiriirka ciidamada safaaradda Finland ee dibadda. Qofka dibadda uga imaanaya in uu waajibkaas fuliyo wuxuu xaq u leeyahay in luqadiisa hooyo ay saraakiishu ugu adeegaan, sidaas darteed adeegga turjumista waa la qabanqaabinayaa haddii loo baahdo. Dadka sida joogtada ah u deggan dibadda ee u imaanaya inay waajibka ciidamada fuliyaan waxaa laga magdhabaa 1–4 safar kharashka ku baxa

oo waafaqsan qiimaha safarka dalka uu qofku deggan yahay. Kharashka safarka ee dibadda looga imaanayo ama aadayo waxaa la magdhabayaa oo kali ah marka uu qofku dibadda u deggan yahay si joogto ah. Finland dumarku xitaa waa codsan karaan ciidamada haddii ay doonayaan. Waajibka ciidamadu wuxuu qaataa inta badan 6–12 bilood.

- **www.puolustusvoimat.fi**

## 13.4 Xaq u lahaanshaha ku dhaqdhaqaaqida duurka (xuquuqda qof kasta)

Xaqa qof walba waxaa loola jeedaa fursadda qof kasta oo Finland uu ku isticmaali karo bii'ada iyadoo aan loo fiirineyn cidda iska leh ama heysata. Ku dhaqdhaqaaqidda duurku uma baahna ogolaansho gaar ah oo laga qaato milkiilaha dhulka sidoo kale looma baahna in lacag laga bixiyo. Laakiin iyadoo la isticmaalayo xuquuqda qof kasta dhib ama qashqashaad lama sameyn karo. Xuquuqda qof walba waa kuwa nooca dhulku yajau lagu qabalay waxay ku saleysan yihiin sharciyo kala duduwan. Xuquuqda qof kasta dadka ajnabiga ahn xitaa waa saameeyaan.

**Waad ku:**

- socon kartaa, baaskiil wadi kartaa islamarkaasna hiiteyn kartaa. Kuma socon kartin bannaanka guri ama beeraha ama tallaalka dhirta ee ku dul socoshadu ay dhaawici karaan;
- Ku dhowaad si xornimo ah ayaad baadiyaha teendhooyin uga taagan karta haddii aadan aad ugu dhowaaneyn guryaha iyo bannaanka guryaha ee dadka kale;
- uruursan guran kartaa mirana dabiiciga ah, likahai yo ubaxyada;
- jilaaban ama kalluumeysan kartaa sidoo kale;
- doon ku wadan kartaa, ku dabbaalan kartaa islamarkaasna ku qubeysan kartaa biyaha meelaha yaala sidoo kale waad ku socon kartaa barafka dushiisa

**Ma:**

- ku sababi kartid qashqashaad ama dhib dadka kale;
- dhibi kartid dhaawacna uma geysan kartid buulasha shimbiraha ilmaha shimbiraha;
- qashqashaadi kartid deerada mana sameyn kartid ciyaar xayawaaneed;
- goyn kartid mana dhaawici kartid geedaha baxaya, qaadan kartid geedaha qalalay ee la gooyay geed gaabta iyo dooga ama wixii lamid ah dhul qof kale;
- ku sameyn kartid dab furan dhul qof kale leeyahay haddii aysan jirin baahi qasab ah;
- qashqashaadi kartid deganaanshaha guryaha, tusaale ahaan adigoo xero ahaan u degayo meel ku dhow guryaha ama qeylo ku sameynaya;
- qashimeyn kartid deegaanka;
- ku wadi kartid gaadiid dhul aadan fasax uga heysan qofka isla leh mana;
- kalluumeysan kartid mana ugaarsan kartid adigoo aan heysan fasaxa arimahaas

Isha: **www.ymparisto.fi**

## 13.5 Sinnaanta, isla sinnaanta iyo faquuqa

Finland faquuqa ama gooni u soocu sharci ahaan waa dembi. Mamnuucista faquuqu waxay saameysaa jinsiga, da'da, asalka, luqada, diinta, caqiidada, fikradda, caafimaadkaa naafanimada ama faquuqa kale ee qofka la xiriira (Dastuurka Finland qeybtiisa 6§).

Golaha dadka laga tirada badan waad la xiriiri kartaa haddii aad la kulantay ama aragtay faquuq la xiriira asalka aad ka soo jeedo ama ajnabinimadaada. Golaha dadka laga tirada badan yahay wuxuu la socdaa heerka iyo xuquuqda ajaanibta ee Finland. Xafiiska Golaha dadka laga tirada badan yahay waxaad u diri kartaa emayl, wici kartaa ama waad booqan kartaa. Waqti horay uga

sii ballanso. Golaha dadka laga tirada badan yahay waxaad kula xiriiri kartaa afkaada hooyo. Warqadaha waa la turjumayaa haddii loo baahdana turjumista ayaa la qabanqaabinayaa.

Golaha dadka laga tirada badan waxaa kale oo uu caawiyaa dhibanayaasha ka ganacsiga dadka. Waad la xiriiri kartaa Golaha dadka laga tirada badan yahay haddii aad dareento in goobta shaqada xaqaada lagu duudsiiyay ama jirkaada laga ganacsaday.

Dhibanayaasha ka ganacsiga dadku waxaa kale oo ay caawimaad ka heli karaan nidaamka caawinta dhibanayaasha ka ganacsiga dadka:

- **+358 71 876 3170**
- **www.ihmiskauppa.fi**

**Golaha dadka laga tirada badan yahay**
Mikonkatu 25, Helsinki
- **0295 488 666**

(amaalmaha shaqada 10-12)
ofm@ofm.fi
- **www.syrjinta.fi**

## CAAWIMAADDA XAALADDA DHIBKU JIRO

Haddii aad dareento in lagu faquuqay ama si qaldan laguula macaamilay waxaad la-talinta ka soo horjeeda Faquuqa ka heleysaa rugta adeegga Heeganka dhibanaha dambiyada (RIKU) telefoonka heeganka ah (tel. 0203 16116 isniin-talaado saacadaha 13-21 iyo arbaco-jimce saacadaha 17-21), sisasuomi@riku.fi. RIKU wuxuu gacan ka geystaan cadeynta hay'adda sida uga fiican gacan uga geysan karta. RIKU waxay gacan ka geysataa haddii loo baahdo u gudbinta arrinta si loo baaro Golaha dadka laga tirada badan yahay. Waxa akale oo jira dadka kale oo arrintan wax ka qabta oo lala xiriiri karo sida:

- Shaqada: La xiriir iskaashada xirfadaada ama xafiiska badbaadada shaqada (macluumaadyada xiriirka bogga 25)
- Adeegyada sooshaalka degmada: La xiriir qareenka sooshaalka degmada. Haddii sida ay kuula muuqato aad go'aan habooneyn ka heshay Kelada ama xafiiska sooshaalka, samee codsi sixitaan oo qoraal ah adigoo raacaya hagsiyada go'aanka la socda (macluumaadyada xiriirka bogga 36).
- Adeegyada caafimaadka ee degmada: La xiriir qareenka bukaanka (macluumaadyada xiriirka bogga 36).
- Codsashada guryaha la kireysto: La xiriir xafiiska Golaha dadka laga tirada badan yahay.
- Haddii cunugaada lagu dhibo iskuulka: La xiriir maamulaha iskuulkiisa, macallimadiisa ama kuraatoriga iskuulka.
- Haddii aad dareento in adiga lagu faquuqay: Haddii aad go'aan diidmo ka hesho codsigaagi magangelyo-doonka la xiriir ururka La-talinta qaxootiga (macluumaadyada xiriirka bogga 59).
- Haddii aad dareento in adiga lagu faquuqay: Haddii aad codsigaada ogolaanshaha joogitaanka aad diidmo ka heshay la xiriir xafiiska caawimaadda sharciga (macluumaadyada xiriirka bogga 51).

# 14. ADEEGYADA QARAN EE DADKA DALKA U SOO GUURAY

## 14.1 Xafiiska dal u soo guurista

Xafiiska dal u soo guurista (Migri) oo hay'ad hoostagta wasaaradda arrimaha gudaha oo ka baaraandegtada islamarkaasna xal ka gaarta imaanshaha dalka, joogista dalka, qaxootinimada iyo arrimaha la xiriira dhalashada Finland. Xafiiska dal u soo guuristu waa khabiirta dal u soo guurista, magangelyada, qaxootinimada iyo arrimaha dhalashada, adeegga iyo ururka go'aan saneynta ee hirgeliya siyaasadda dal u soo guurista ee Finland. Hay'ada waxaa kale oo ay soo saartaa adeegyada aqoonta ee taageeraya gaarista go'aan siyaasadeedka iyo wadashaqeynta qaran iyo tan caalamiga ah.

**Xafiiska dal u soo guurista**
Lautatarhankatu 10, Helsinki
- **0295 419 600**
- **www.migri.fi**

## 14.2 Bangiga wararaka

Bangiga wararka waxaad ka heleysaa macluumaadka aasaasiga ah ee ku saabsan bulshada Finnishka iyo dhaqankooda, ruqsadaha degista Finland loogu baahan yahay, helista guryaha la dego, barashada luqada finnishka, shaqada iyo hawlaha shirkadda, waxbarashada, daryeelka caafimaadka, adeegyada bulshada, kaalmada marka dhib lagu jiro, adeegyada dhaqanka iyo waqtiyada firaaqada iyo hawlaha ururada oo 15 luqadood ku qoran iyo isku xiryo bogag kale ku soo gudbinaya, kuwaas oo aad ka heleyso macluumaad dheeraad ah.

- **www.infopankki.fi**

## 14.3 In To Finland, Coming to work in Finland

InTo waa rug adeeg oo ay Kelada iyo Maamulka canshuuruhu leeyihiin waxaana loogu talagalay shaqaalaha Finland imaanaya iyo kuwa tegaya. Shaqaalaha ka sokoow InTo waxay adeegtaa shirkada Finland imaanaya, ardayda iyo shirkadaha xoogga shaqaalaha dibadda ka soo qoranayo ama ka soo waaridaya. Rugta adeegga ee InTo waxaa ka shaqeeya saraakiil luqado yaqaan oo ka jawaabaya su'aalaha la xiriira ammaanka bulshada Finland iyo canshuuraha waxyayna sidoo kale macaamiisha ku hagaan saraakiisha kale ee qaabilsan dadka dalka u soo guuray. In To waxay ku taalaa daarta Autotalo ee Kamppi, Helsinki. Rugta adeegga ee InTo lagama helo adeegga qadka telefoonka. Ballanta kulanka waxaad ku qabsan kartaa emayl.

**In To Finland**
Salomonkatu 17, jaranjarada A dabaqa 2aad
PL 82, 00601 Helsinki
nfo@intofinland.fi
- **www.intofinland.fi**

## 14.4 Heeganka dhibanaha dembiga (RIKU)

Adeegyada caawinta ee RIKU waxaa loogu talagalay dhibanaha dembiga, ehelka dhibanaha iyo marqaatiga arrimaha dembiga. RIKU waxay bixisaa talo iyo kaalmooyin waaya-ragnimada dembiga kadib waxaa kale oo haddii loo baahdo ay gacan ka geysataa arrimaha wax ka qabadka ee arrimaha dembiga la xiriira. RIKU waxaa laga heli karaa qof qof mudo dheer ku kaalmeeya, kaas oo kuu raaci kara tusaale ahaan qeybta booliska ama

qaadista dacwada. Caawimaad waxaad u heleysaa sidoo kale mamnuucista ka soo agdhowaansha iyo arrimaha faquuqa.

Adeegyadu waxay ku saleysan yihiin shaqo mutadawacnimo ah oo la ilaaliyo. Adeegyadu macaamiisha waa u lacag la'aan, telefoonada oo kali ah ayeey shirkaddu ku qaadataa lacagta shabakadda deegaanka. Adeegga waxaad ku heleysaa luqada finnishka iyo ingiriiska, luqadaha waxaa la isku dayayaa in turjumis sida ugu macquulsan loo qabanqaabiyo. Magac la'aan ayaad kula soo xiriir kartaa, wadahadalkuna waa mid sir ah. RIKU diin iyo siyaasad kuma xirna.

**Taageerada shaqsiga ah iyo shaqsiyaad wax taageera:**

**Adeegyada qaran:**
Telefoonka wax caawiya
Talo-bixinta telefoonka ee sharciyaqaanka
Talo-bixiyaha shabakadda

**Rugta adeegga RIKU ee Hämeenlinna RIKU**
Suomen kasarmi 2
• **050 378 2877** (waqtiga shaqada ee maalmaha shaqada)
• **0203 16116** Isniin-Khamiis 13–21, Arbaco-Jimco 17–21
• **www.rikunet.fi**

Qeybaha soo saara RIKU waa Iskaashatada Setlementti ee Finland, Laanqeyrta Case e Finland, Iskaashatada Guryaha ammaanka iyo Guri-horaadyada, Midowga Arrimaha Dumarka, Maamulka Kaniisadda, Jimciyadda caafimaadka dhimirka ee Finland iskaashatada badbaadada carruurta ee Mannerheim. Maalgeliyayaasha ugu waa waaweyn ee Dowladda iyo Ururka awtamaatikada lacagta.

Macluumaadyada rasmiga ah ee adeegyada (15 luqadood oo kala duduwan ku qoran) iyo macluumaadyada xiriirka ee goobaha shaqada waxaa laga helaa cinwaanka **www.riku.fi**

## 14.5 Xarunta khabiirada dhaqamada badan ee Midowga dadka

Xarunta khabiirada dhaqamada badan ee Midowga dadka waxay kalameysaa wannaagsanaanta iyo la-qabsashada dalka ee qoysaska dalka u soo guuray, carruurta iyo dhalinyarada. Xarunta khabiirada waxaa ka shaqeeya khubaro. Waxqabadka xarunta khabiirada waxaa kamid ah kooxda isbarbar-dhiga oo luqado kala duduwan ku qoran (VePa), tababarka dadka muhaajiriinta shaqadooda kula kulmo, soo saarista agabka la xiriira la- qabsashada dalka iyo la xaajooshada macaamiisha.

**Xarunta khabiirada dhaqamada badan ee Midowga dadka**
Kalevankatu 16 B dabaqa 3aad, Helsinki
kotipuu@vaestoliitto.fi
• **www.vaestoliitto.fi/monikulttuurisuus**

## 14.6 Ururka La-talinta qaxootiga

La-talinta qaxootigu wuxuu magangelyo doonka, qaxootiga iyo ajnabiga kale ee jooga Finland siisaa caawimaad iyo talooyin dhinaca sharciga ah.

**Xafiiska Ururka la-talinta Qaxootiga ee Helsinki**
Kaisaniemenkatu 4 A, dabaqa 6aad, Helsinki
• **075 7575 100**
pan@pakolaisneuvonta.fi
• **www.pakolaisneuvonta.fi**

## 14.7 Xarunta awoodda Dhaqamada badan Monika

Ururku wuxuu adeegyo lacag la'aan ah u fidiyaa dumarka iyo carruurta dalka u soo guuray ee la kulma dhib ama rabshad. Caawimaad waxaa lagu helaa luqado badan oo kala duduwan. Ururka Dumarka Monika waa dallada ururada dumarka ee kamidka ah ururada dadka laga tirada badan yahay. Iskaashatadu waxay kaalmeysaa wannaagsanaanta haweenka dalka u soo guuray iyo waxqabad bulshadeedkooda firfircoo, waxay adeegyo u sameysaa carruurta iyo dumarka dalka u soo guuray ee dagaalka ama rabshadda la kulmay, saamey ku yeelataa sameynta go'aanada iyo weliba tababarista ay u fidiso xirfadlayaasha sooshaalka iyo caafimaadka.

TELEFOONKA HEEGANKA AH 24:KA SAAC EE DALKA OO DHAN
TELEFOON 09 692 2304

**Ururka Dumarka Monika**
Hermannin Rantatie 12 A, 00580 Helsinki
• **09 72 79 9999**
info@monikanaiset.fi
• **www.monikanaiset.fi**

## 14.8 Xarunta farshaxanka caalamiga ah ee Kassandra

Kassandra waxaa xarun farshaxaneed caalami ah oo ku taal Helsinki waxayna isu keentaa farshaxanlayaasha Finnishka asalka ah iyo kuwa cusub, waxay soo saartaa bandhigyo tiyaatareedyo iyo munaasabado farshaxan waxay fidisaa macluumaad ku saabsan wax wadaagga dhaqamada kala duduwan u dhexeeya, waxay u qabanqaabisaa hoosadaha shaqada farshaxanka dumarka, carruurta, dhalinyarada iyo iskuuleyda waxaa kale oo ay soo saarta aisla markiisa kala gudbisaa barnaamijyada farshaxanka oo dhan: muusikada, qoob ka ciyaarka, xirfad gacmeedka iyo gabayga.

**Kassandra ry**
Aleksanterin teatteriBulevardi 23-27,
00180 Helsinki
010 4399 190
kassandra@kassandra.fi
• **www.kassandra.fi**

kassandra

# XUSUUS QORYO:

## LIFAAQA 1: Soo guurista shaqaalaha Finland uga soo guura soonaha Midowga Yurub

| | |
|---|---|
| **Joogista** | • Shaqo mushaar lagu qaato looguma baahna ogolaanshaha joogitaanka.<br>• Haddii shaqada gudaha Finland ay dheertahay 3 bilood xuquuqda lagu dagayo waa in laga diiwaangeliyaa goobta shaqada ee Hay'adda socdaalka Finnish. Is-diiwaangelinta waxaad ka heleysaa cadeynta diiwaangelinta.<br>• Xuquuqda joogitaanku si ku meelgaar ah ayeey u jireysaa. Shan sano oo joogis ah kadib ayaa waxaa shaqaalaha la siinayaa xuquuqda joogista abidka ah. |
| **Rajistareeshinka** | • Shaqaaluhu waa in uu iska diiwaangeliyaa nidaamka macluumaadka dadka ee rajistareeshinka si loo diiwaangeliyo.<br>• Haddii joogista Finland ay qaadatay ugu yaraan 3 bilood, waxaa intaas dheer oo loo baahan yahay diiwaangelinta xaqa joogista.<br>• Waa la helayaa aqoonsiga qofka; waxaa la isu diiwaangelinayaa sidii qof rasmi u degan Finland haddii joogistu loogu talgalay inay sii socoto. |
| **KELA** | • Shaqaaluhu wuxuu qeybaha xeyndaabka ammaanka bulshada Finland u gelayaa si ku meelgaara ah, haddii shaqeyntu ay sii socoto wax ka badan 2 sano (shaqo joogta ah).<br>• Shaqaaluhu wuxuu gelayaa xeyndaabka ammaanka bulshada Finland mudada uu shaqeynayo, haddii shaqeyntu ay socoto 4 bilood. 2 sano. Mudada uu shaqeynayo wuxuu shaqaaluhu xaq u leeyahay manfacyada caymiska caafimaadka, kaalmada xannaaneynta guriga ee carruurta iyo dheeraadka carruurta. Waxaa kale oo billaabanaya inay u aruuraan hawgabka shacabka iyo hawlgabka qoyska, wuxuuna qeyb ka ahaanayaa xeyndaabka ammaanka shaqo la'aanta ee Finland.<br>• Shaqaaluhu ma gelayo xeyndaabka ammaanka bulshada Finland haddii shaqeyntiisu ay qaadato wax ka yar 4 bilood. Haddii shaqaalaha caymsika hawlgabka shaqada looga bixinayay Finland wuxuu xaq u leeyahay lacagta daryeelka guri ku xannaaneynta cunugga iyo dheeraad xannaaneynta iyo daryeelka caafimaadka ee ay maamulaan degmooyinku. |
| **Xafiiska canshuurta** | • Haddii guriga rasmiga ah ee shaqaaluhu uu ku yaal Finland ama uu Finland u yimid in uu joogo wax ka badan 6 bilood, sida guud waxaa saaran waajibka canshuurta ee Finland waana in uu mushaarkiisa Finland ka siiyaa canshuur islamarkaasna uu Finland u gudbiyaa ogeysiiska canshuurta.<br>• Haddii shaqaaluhu uu joogayo Finland ugu badnaan 6 bilood Finland waxaa ku saaran waajib canshuureed xadeysan. |

## Xafiiska shaqada iyo ganacsiga

• Marka shaqo la'aan aad gasho waxaad Xafiiska shaqada iyo ganacsiga isaga diiwaangelin kartaa shaqo raadiye.
• Xeyndaabka ammaanka shaqo la'aanta Finland waxaad geli kartaa haddii aad Finland ka shaqeyneysay ugu yaraan afar todobaad islamarkaasna aad rasmiyan u deggan tahay Finland, taariikhda shaqo ee kuugu aruurtay wadanka kale oo Midowga Yurub ah waxaa lagu soo wareejin karaa foomka E301 si loo buuxiyo shuruudaha shaqada.
• Haddii shaqaaluhu uusan ka gaarin in uu Finland ka shaqeeyo afar todobaad islamarkaasna uusan wadanka kale oo Midowga Yurub ka tirsan ku laheyn wax taariikh shaqo ah wuxuu geli karaa xeyndaabka suuqa shaqada (waxaa la isaga baahan yahay deganaanshaha joogtada ah ee Finland).

## Adeegyada guud ee aasaasiga ah

• Wuxuu xaq u leeyahay dhammaan adeegyada guud ee aasaasiga ah.

## LIFAAQA 2: LIITE 2: U soo guurista Finland ee Xubinta qoyska shaqaaluhu* uu ka soo guuro soonaha Midowga Yurub

| | |
|---|---|
| **Joogista** | • Joogista Finland uma baahna ogolaanshaha joogista.<br>• Haddii daganaanshaha Finland uu ka dheeryahay 3 bilood xuquuqda lagu dagayo waa in laga diiwaangeliyaa goobta shaqada ee Waaxda socdaalka Finnish. Is-diiwaangelinta waxaad ka heleysaa cadeynta diiwaangelinta.<br>• Xubinta qysku wuxuu helayaa xuquuqda joosta Finland, haddii isu keenaha qoysku uu isagu buuxsho shuraadaha la isaga baahan yahay joogista dalka. Intaas waxaa dheer oo la isaga baahan yahay in xubinta qoysku uu heysto hanti ku filan joogistiisa darteed iyo caymiska caafimaadka ee loo baahan yahay.<br>• Xuquuqda joogitaanku si ku meelgaar ah ayeey u jireysaa. Shan sano oo joogis ah kadib ayaa waxaa shaqaalaha la siinayaa xuquuqda joogista abidka ah.<br>• Xubnaha qoyska iyo ehelka kale si xornimo leh ayeey Finland uga shaqeyn karaan marka ay helaan kaarka joogista ama ay diiwaangeliyaan xuquuqdooda joogista. Iyaga lagama doonayo ogolaanshaha joogsita shaqaalaha ee gaar ah. |
| **Rajistareeshinka** | • Xubinta qoysku waa in uu iska diiwaangeliyaa nidaamka macluumaadka dadka ee rajistareeshinka si loo diiwaangeliyo.<br>• Haddii joogista Finland ay qaadatay ugu yaraan 3 bilood, waxaa intaas dheer oo loo baahan yahay diiwaangelinta xaqa joogista.<br>• Waa la helayaa aqoonsiga qofka; waxaa la isu diiwaangelinayaa sidii qof rasmi u degan Finland haddii joogistu loogu talgalay inay sii socoto. |
| **KELA** | • Gelitaanka xeyndaabka ammaanka bulshada Finland wuxuu ku xiran yahay deganaanshada rasmiga ah ee Finland.<br>• Si kastoo ay ahaataba xubnaha qoyska ee shaqaalaha ka shaqeeya Finland waxay xaq u leeyahay sida uu qabo xeerka Midowga Yurub daryeelka caafimaadka iyo manfacyada qoyska ee Finland haddii ay xitaa Finland si ku meelgaarka ah u degan yihiin amaba aysan abidkoodba deganeyn Finland. |
| **Xafiiska canshuurta** | • Haddii guriga rasmiga ah ee shaqaaluhu uu ku yaal Finland ama uu Finland u yimid in uu joogo wax ka badan 6 bilood, sida guud waxaa saaran waajibka canshuurta ee Finland waana in uu mushaarkiisa Finland ka siiyaa canshuur islamarkaasna uu Finland u gudbiyaa ogeysiiska canshuurta.<br>• Haddii shaqaaluhu uu joogayo Finland ugu badnaan 6 bilood Finland waxaa ku saaran waajib canshuureed xadeysan. |
| **Xafiiska shaqada iyo ganacsiga** | • Shaqo raadiye waa la isaga diiwaangelin karaa. |

## Adeegyada guud ee aasaasiga ah

- Wuxuu xaq u leeyahay dhammaan adeegyada guud ee aasaasiga ah.

***Xubnaha qoyska ee muwaadiniinta wadamada MIidowga Yurub, Switzerland iyo Liechtenstein waa:**

- wixii ka yar 21 sano iyo carruurta mas'uulka laga yahay
- xaaska, xaaska ama lamaanaha xiriirka diiwaangashan
- waalidka uu isagu mas'uulka ka yahay
- carruurta xaaska, haddii ka yaryihiin 21 sano ama mas'uul laga yahay
- waalidka ay mas'uulka ka tahay ama ka yahay xaasku
- mas'uulka haddii qofka deggan Finland uu ka yaryahay 18 sano

**Xubin qoys ee muwaadinka Midowga waxaa kale oo la barbardhigi karaa ehelka kale:**

- Haddii wadanki uu ka soo tegay muwaadinka Midowgu uu joogo qof uu mas'uul ka ahaa ama uu hal guri kula noolaa, ama xaalado daran oo caafimaad dartood ay qasab tahay in muwaadinka Midowgu in uu shaqsiyan u daryeelo.

## LIFAAQA 3: Soo guurista shaqaalaha Finland uga soo guuray wadamada saddexaad ee ka baxsan Midowga Yurub

| | | |
|---|---|---|
| | **Shaqada mushaarka lagu qaatdanayo ee Finland waxay u baahan tahay ogolaanshaha joogitaanka**. Waxaa la bixiyaa iyadoo nooca shaqada ku xiran:** | |
| **Joogista** | **• Heshiiska shaqada ee illaa amar dambe shaqeynaya, ogolaanshaha joogitaanka ee sii socda (martabada A)**<br>• ogolaansho joogitaanka ee waafaqsan shaqada la qabanayo<br>• waxaa marka hore la ogolaadaa sanad, sii socoshadana ugu badnaa 4 sano markiiba | **• Heshiiska shaqada ee ku meelgaarka ah, ogolaanshaha joogitaanka ku meelgaarka ah (martabada B)**<br>• dhacdooyinka qaarkood ogolaanshaha joogitaanku wuxuu noqon karaa mid shaqo bixiyaha u gaar<br>• waxaa lagu bixiyaa si waafaqsan waqtiga xiriirka shaqadu uu qaadanayo, si kastaba ugu badnaan 2 sano; sii socoshadana 1 sano markiiba |
| | • waqtiga ay qaadaneyso ogolaanshaha joogitaanku waa ugu badnaan mid jireysa inta uu baasaboorku shaqeynayo<br>• Ruqsada deganaanshaha hore iyo kordhinta ruqsada waxaa ka baarandago Waaxda socdaalka Finnish. | |
| **Rajistareeshinka** | • waa la helayaa aqoonsiga qofka; waxaa la isu diiwaangelinayaa sidii qof rasmi u degan Finland | • waa la helayaa aqoonsiga qofka; waxaa la isu diiwaangelinayaa sidii qof ku meelgaar u degan Finland |
| **KELA** | • waa la gelayaa xeyndaabka ammaanka bulshada Finland (shaqeyntu waa in qaadataa wax ka badan 2 sano), waa la helayaa kaarka Kelada | • qeyb ahaan ayaa la gelayaa xeyndaabka ammaanka bulshada Finland, marka shaqeyntu ay dhaafto 4 bilood (mudada shaqeynta), xiriirka shaqado waa in uu buuxiyaa shuruudaha shaqada* |
| **Xafiiska canshuurta** | **• sida guud waxaa saaran waajibka canshuurta ee Finland** kaarka canshuurta ee shaqo bixiyaha ayaad heleysaa, canshuurta ayaad mushaarkaada Finland ka siineysaa; wa ain Finland la siiyaa ogeysiiska canshuurta | **joogista ugu badan 6 bilood waajib cabshuureed xadeysan,** shaqo bixiyuhuna waa shirkad Finnish ah<br>• canshuurta Finland la siinayo 35 %, shaqo bixiyuhu ma ahan Finnish (kuma lahan cinwaanka shaqo oo rasmi ah Finland)<br>• mushaarkiisa canshuur lagama siinayo Finland; shaqaalaha la soo ijaartay |

| | | |
|---|---|---|
| **Xafiiska canshuurta** | | • mushaarka canshuur ayuu Finland ka siinayaa (marka shaqaaluhu uu ka yimaado wadamada Waqooyiga Yurub, wadamada Baltikada, Moldova, Georgia ama wadamada aysan Finland la laheyn heshiiska canshuurta)<br><br>**joogista ka badan 6 bilood: guud waxaa saaran waajib canshuureed**<br>• mushaarkiisa canshuur ka siinayaa Finland; waa in uu Finland siiyaa ogeysiiska canshuurta; shaqaalaha la soo ijaartay, ee jooga Finland in ka badan 183 maalmood waa in uu horay u soo qaataa qiimeynta canshuurta |
| **Xafiiska shaqada iyo ganacsig** | • marka shaqo la'aan aad gasho waxaad Xafiiska shaqada iyo ganacsiga isaga diiwaangelin kartaa shaqo raadiye<br>• waxaad geli kartaa maamulka siyaasada xoogga shaqada<br>• xaq ayaad u leedahaya manfacyada shaqo la'aanta, haddii shuruudaha shaqada* la buuxiyay (waxay u baahan tahay 2 sano heshiis shaqo ah) | • Xafiiska shaqada iyo ganacsiga waxaad isaga diiwaangelin kartaa shaqo raadiye<br>• ma geli karo leyliska shaqada iyo tababarka shaqada ei<br>• waa ka qeybqaadan karaa waxbarashada siyaasadda xoogga shaqada<br>• ma helayo manfaca shaqo la'aanta |
| **Adeegyada guud** | • wuxuu xaq u leeyahay dhammaan adeegyada guud ee aasaasiga ah | **Daryeelka caafimaadka:**<br>• kayar 4 bilood- xaq uma lahan;<br>• kayar 2 sano. xaq ayuu u leeyahay daryeelka caafimaadka<br>**adeegyada bulshada:**<br>• kayar 4 bilood- xaq uma lahan manfacyada sooshaalka<br>• kayar 2 sano- si xadeysan ayuu xaq u leeyahay, magdhawyada caafimaadka, lacago maalmeedka jirada |

***shuraadda shaqada:** sanadki 2010 shuruudda shaqada ee laga rabo mushaar qaataha markii ugu horeysay helaya lacag maalmeedka shaqo la'aanta waa 34 todobaad (qiyaastii 8 bilood) 28 bilood ee la soo dhaafay intii lagu jiray (Shaqada waa in la sameeyaa ugu yaraan 18 saacdood todbaadkii, mushaarkuna waa in uu noqdaa mid waafaqsan heshiiska shuruudda shaqada. Haddii majaladda shaqadu aysan laheyn heshiiska shuruudda shaqada waxaa qasab ah in shaqadu ahaato mid waqti kasta oo mushaarkeedu uu ugu yaraan 1052 bishii.).

***shaqeynta ogolaanshaha joogista la'aan:** Xaalado cayiman marka lagu jiro ajnabigu wuxuu shaqo uu mushaar ku qaato ka sameyn karaa Finland isagoo aan heysan ogolaanshaha joogitaanka. Si kastaba waa in uu heystaa dal-ku-gal shaqeyneysa haddii dal-ku-galku uu waajib ku yahay.

**Ogolaanshaha joogitaanka shaqaalaha uma baahna:**
• Turjubaanada, macllimiinta, khabiirada iyo garsoorayaasha isboortiga ee ku shaqeynaya casuumaad ugu badnaan saddex bilood.
• Xirfadlayaasha farshaxan ama ciyaartoyda ama kaaliyayaashooda ee ku shaqeynaya casuumaad ama heshiis ugu badnaan saddex bilood.
• Badmaaxayaasha ka shaqeeya markabka diiwaangashan Diiwaangelinta Ganacsiga Maraakiibta ee ku calaamadeysan ganacisga dibadda ama inta badan isaga goosha dekadaha dibadda dhexdooda.
• Gurayahaasha miraha ama qudradda, ee shaqeynaya ugu badnaan saddex bilood.
• Shaqaalaha joogtada ah ee shirkad wadan kale oo Midowga Yurub ama ETA ka tirsan oo Finland si ku meelgaar ah ugu sameynaya shaqo qandaraas ama qandaraas-hosaad ah. Waxaa la isaga baahan yahay in ajnabigu uu wadanka kale ku heysto ruqsooyin shaqo oo shaqeynaya islamarkaasna waafaqsan arrimahaas.

# LIFAAQA 4: U soo guurista Finland ee hubinta qoyska shaqaaluhu* uu ka soo guuray dal wadamada saddexaad ee ka baxsan soona Midowga Yurub

| | |
|---|---|
| **Joogista** | • Joogista Finland waxay u baahan tahay ogolaanshaha joogitaanka.<br>Ogolaanshaha joogitaanka waxaa lagu bixinayaa xiriir qoyska. Nolosha xubinta qoyska ee Finland waa in la damaanad qaadaa. Ogolaanshaha joogitaanka xubinta qoysku waxay shaqeyneysaa inta ay shaqeneyso isu keenaha qoysku waxayna sidoo kale lamid tahay nooca martabada ogolaanshaha joogitaankiisa.<br>• Ogolaanshaha joogitaanka waxaa laga codsanayaa dibadda kahor imaanshiyaha Finland. Xubinta wuxuu xaalado cayiman uu ku imaan karaa Finland isagoo aan horay u soo qaadan ogolaanshaha joogitaanka kadibna gudaha Finland ka codsan karaa**.<br>• **Ogolaanshaha joogitaanka sii-socda (martabada A)** waxaa marka ugu horeysa la bixiyaa sanad; sii-socoshada ugu badnaan 4 sano markiiba<br>• waqtiga ay qaadaneyso ogolaanshaha joogitaanku waa ugu badnaan mid jireysa inta uu baasaboorku shaqeynayo<br>• Ruqsada deganaanshaha hore iyo kordhinta ruqsada waxaa ka baarandago Waaxda socdaalka Finnish. |
| **Rajistareeshinka** | • waa la helayaa aqoonsiga qofka; waxaa la isu diiwaangelinayaa sidii qof rasmi u degan Finland |
| **KELA** | • wuu gelayaa xeyndaabka ammaanka bulshada Finland, helayaa kaarka Kelada |

| | | |
|---|---|---|
| **Xafiiska canshuurta** | • guud ahaan waxaa saaran waajibka canshuurta waana helayaa kaarka canshuurta; wuxuu Finland ka ka siinayaa mushaarka ama manfacyada bulshada canshuur; waa in uu Finland siiyaa ogeysiiska canshuurta | joogista ugu badan 6 bilood waajib cabshuureed xadeysan, shaqo bixiyuhuna waa shirkad Finnish ah.<br>• canshuurta Finland la siinayo 35 %, shaqo bixiyuhu ma ahan Finnish (kuma lahan cinwaanka shaqo oo rasmi ah)<br>• mushaarkiisa canshuur lagama siinayo Finland; shaqaalaha la soo<br>• mushaarka canshuur ayuu Finland ka siinayaa (marka shaqaaluhu uu ka yimaado wadamada Waqooyiga Yurub, wadamada Baltikada, Moldova, Georgia ama wadamada aysan Finland la laheyn heshiiska canshuurta)<br><br>joogista ka badan 6 bilood: guud waxaa saaran waajib canshuureed<br>• Mushaarka canshuur ayaa Finland laga siinayaa; waa in Finland la siiyaa ogeysiiska canshuurta |
| **Xafiiska shaqada iyo ganacsig** | • waxaad geli kartaa maamulka siyaasada xoogga shaqada; xaq ayaad u leedahay manfacyada shaqo la'aanta | • Xafiiska shaqada iyo ganacsiga waxaad isaga diiwaangelinta kartaa shaqo raadiye voi<br>• waxaad si xadeysan u isticmaali kartaa adeegyada Xafiiska shaqada iyo ganacsiga ma heleyo manfacyada shaqo la'aanta ei |
| **Adeegyada guud** | • wuxuu xaq u leeyahay dhammaan adeegyada guud ee aasaasiga ah | • waa isticmaali karaa adeegyada sooshaalka ee degmada deegaanka iyo adeegyada caafimaadka ee aan laga maarmin diiwaangelinta guri-degmada kadib***<br>•xaq uma lahan manfacyada bulshada |

*** xubnaha qoyska ee aan aheyn muwaadiniinta Midowga Yurub:**
• xaaska
• lamaanaha diiwaangashan
• xaaska guurka furan
• cunugga aan guursan ee 18 sano kayar kaas oo mas'uulkiisa uu yahay qofka deggan Finland
• mas'uulka haddii qofka deggan Finland uu ka yaryahay 18 sano.

****ogolaanshaha waxaa lagu bixiyaa gudaha Finland, haddii:**
• codsaduhu uu xitaa ku heli laha aogolaanshah markuu dibadda ka codsado iyo
• codsadaha oo intuusan imaanin Finland ugu labo sano la noolaa xaaska ama xaaska guurka furan ee hadda deggan Finland, ama
• diidista ogolaanshaha joogitaanku uu aan qiil laheyn.

*** sanad joogitaanka ku meelgaarka ah kadib, haddii xaaladdu tahay in joogitaanku la doonayo in uu sii socdo, waxaa guri-degmo laga heli karaa Finland

Lifaaqyada waxaa soo saaray:
POINTTI – U bedleista dadka dalka u soo guuray xoog-shaqo Galbeedka – Savo-Mashruuca
Mikkeli 2010.

# LIFAAQA 5: MARKA AAD DIBADDA UGUA SOO GUURTO HÄMEENLINNA- liiska xusuusta

**OGOLAANSHAHA JOOGITAANKA MISE IS-DIIWAANGELIN?**
Muwaadiniinta Waqooyiga Yurub uma baahna ogolaashaha joogitaanka.
Muwaadiniinta Waqooyiga Yurub waxay iska diiwaangeliyaan rajistareeshinka (joogitaanka 6 bilood ka badan).
Muwaadinka Midowga Yurub waa in uudiiwaangeliyaa daganaanshaheeda/daganaanshihiisa saddex bilood kaddib goobta shaqada ee Waaxda socdaalka Finnish.
Wadanka ka baxsan Midowga Yurub qofka ka imaanaya wuxuu u baahan yahay ogolaanshaha joogitaanka.
Ruqsada daganaanshaha iyo diiwaangelinta waxaa ka baarandaga Waaxda socdaalka Finnish.
• Marka aad arrimahaada fushaneyso soo qaado markasta baasaboor, aqoonsiga yurub, ogolaanshaha joogitaanka iyo cadeymaha kale!

## 1. HADDII AAD TAHAY MUWAADIN MIDOWGA YURUB/ EEA-.1 OO AAD DAGANTAHAY FINLAND IN KA BADAN 3 BILOOD, ISKA DIIWAANGELI WAAXDA SOCDAALKA FINNISH

**Xafiiska dal u soo guurista**
- **0295 419 600**
- **www.migri.fi**
- **enterfinland.fi**

**Buuxi foomka**
- Diiwaangelinta xaqa joogista ee muwaadinka Midowga Yurub (waa lacag))
- Xubinta qoyska ee muwaadinka Midowga Yurub oo aan aheyn muwaadinka dowlad Midowga Yurub ah ama dowlad la barbardhigi karo waa in uu codsadaa kaarka ogolaanshaha (waa lacag)

**Xaqa joogitaan waxaa la diiwaangeliyaa marka**
- aad heystao boos shaqo ama aad si iskaa ah xirfadaada ugu shaqeyso
- aad heysato hanti kugu filan kaarka caymiska caafimaadka ama
- lagu ogolaaday in aad qeyb waxbarasho wax ka barato adiguna aad heysato hanti kugu filan ama
- Finland uu kuu deggan yahay qofka uu xiriir qoys idinka dhexeeyo.

## 2. ISKA DIIWAANGELI RAJISTAREESHINKA

U qaado Rajistareeshinka shahaadada dhalashada, nikaaxa, furiinka iyo mas'uulinimada oo la finnish lagu turjumay shabadda sharciyeyntana la ssaaray

Birger Jaarlinkatu 13
• **029 553 9361**
Wuxuu furan yahay Isniin-Jimco saacadda 8–16.15

**Buuxi foomka**
- Ogeysiiska diiwaangelinta ajnabiga
- Ogeysiiska soo guurista

Diiwaangelinta kadib waxaad heleysaa aqoonsiga qofka. Hubi in aad xaq u leedahay iyo in aadan u laheyn calaameynta guri-degmo.

## 3. QOFKA SHAQEEYA WUXUU XAFIISKA CANSHUURTA UGA BAAHAN YAHAY KAARKA CANSHUURTA

U qaado Xafiiska canshuurta aqoonsiga qofka ee aad ka heshay rajistareeshinka.

Lukiokatu 26
- **020 612 000**
- **www.vero.fi**

Wuxuu furan yahay Isniin-Jimco saacadda 9–16.15

**Buuxi foomka**
- Codsiga kaarka canshuurta ee waxa ku soo gala (haddii aad shaqeyneyso wax ka yar 6 bilood)
- Codisga kaarka canshuurta (marka aad shaqeyneyso 6 bilood ka badan)

## 4. KA HUBSO KELADA XAQAADA AMMAANKA BULSHADA FINLAND

Rauhankatu 1
- **020 634 0200**

Waxay furan tahay Isniinta 9–17, Talaada-Jimco 9–16

**Buuxi foomka U77**
- Codsiga xeyndaabka ammaanka bulshada deegaan dartiis.

## 5. XAFIISKA SHAQADA IYO GANACSIGA ISKA DIIWAANGELI MARKA AAD SHAQO IYO WAXBARASHO CODSANEYSO

Saaristenkatu 3
- **0295 041 441**

Wuxuu furan yahay Isniin-Jimco 9–15.45

Qofka shaqo raadiye isu diiwaangeliaya wuxuu xaq u leeyahay adeegyada shaqaaleynta iyo macluumaadka fursadaha waxbarasho ee Finland.

## 6. FURO XISAABAAD BANGI

Bangiga u qaado baasaboor iyo aqoonsiga qofka. Bangiyadu waa tusaale ahaan Nordea, Sampo iyo Osuuspankki. Bangiyada qaar kood waxay u baahanyihiin kaarka aqoonsiga qofka oo sawir leh (ID-card), kaasoo aad ka soo iibsan karto poliiska maxaliga ah.

## 7. GURYAHA WAXAAD KU CODSAN KARTAA CODSI

**Hämeenlinnan Asunnot Oy VVO**
Raatihuoneenkatu 7
- **03 625 161**
- **www.hameenlinna.fi/Palvelut/Asuminen-ja-ymparisto/Asumisen-palvelut/Vuokra-asunnot/**

**MACLUUMAAD KU SAABSAN ADEEGYAD AIYO BUSLHADA OO KU QORAN LUQADA KALA DUDUWAN**
- **http://www.infopankki.fi/**
- **kansalaisneuvonta.fi**
- **www.lifeinfinland.fi**
- **www.intofinland.fi**

## CAAWIMAAD IYO TALO-SIIN LA XIRIIRTA DAL U SOO GUURISTA WAXAAD KA HELEYSAA

**RUGTA ADEEGGA WADAAGGA MAGAALADA EE KASTELLI IFADA DAL U SOO GUURISTA**
Palokunnankatu 16
• **050 304 5472**

Waqtiyada furnaanshada iyo luugadaha hagitaankaba ka fiiri bogagga internetka:
• **www.hameenlinna.fi/maahanmuutto**

**QAABILAADDA QAXOOTIGA**
(qaxootiga, magangelyo doonka iyo dib u soo guureyaasha inkerinsuomalaisetka ah)

Kastelli, Palokunnankatu 16, Heeganka maalmaha arbacada
13.00 - 15.30
• **03 621 2815**


HÄMEENLINNA
FINLAND
LAHTI
LAHTI
Aulangontie
Tampereentie
Pälkäneentie
AULANKO
Aulangon-
vuori
Näkötorni
Kilometrimäki
Hakalanniemi
Mäntykärki
SAIRIO
KATILA
OJOINEN
Tiiriö
57



## Kaartada bartamaha Hämeenlinna






## Nambarada oo finnish ah

| Nambar ahaan | Eray ahaan | |
|---|---|---|
| 0 | nolla | eber |
| 1 | yksi | kow |
| 2 | kaksi | labo |
| 3 | kolme | saddex |
| 4 | neljä | afar |
| 5 | viisi | shan |
| 6 | kuusi | lix |
| 7 | seitsemän | todobo |
| 8 | kahdeksan | sideed |
| 9 | yhdeksän | sagaal |
| 10 | kymmenen | toban |
| 11 | yksitoista | kow iyo toban |
| 12 | kaksitoista | labo iyo toban |
| 13 | kolmetoista | saddex iyo toban |
| 14 | neljätoista | afar iyo toban |
| 15 | viisitoista | shan iyo toban |
| 16 | kuusitoista | lix iyo toban |
| 17 | seitsemäntoista | todobo iyo toban |
| 18 | kahdeksantoista | sideed iyo toban |
| 19 | yhdeksäntoista | sagaal iyo toban |
| 20 | kaksikymmentä | labaatan |
| 30 | kolmekymmentä | sodon |
| 40 | neljäkymmentä | afartan |
| 50 | viisikymmentä | konton |
| 60 | kuusikymmentä | lixdan |
| 70 | seitsemänkymmentä | todobaatan |
| 80 | kahdeksankymmentä | sideetan |
| 90 | yhdeksänkymmentä | sagaashan |
| 100 | sata | boqol |
| 101 | satayksi | boqol iyo kow |
| 1000 | tuhat | kun |

## Nambarada telefoon ee muhiimka ah

| | |
|---|---|
| Ambalaas, boolisi yo dab-damis | 112 |
| Xiriirinta magaalada | +358 3 6211 |
| Tagsi | +358 3 106 2500 |
| Nambarada wax la weydiiyo ee lacagta ah waa | 020202 ama 0100 100 ama 118 |
| Adeegga jidka | 0200 8080 |
| Jadwalada tareenka | www.vr.fi |
| Jadwalada diyaaradaha | www.finnavia.fi |
| Jadwalada basaska | www.matkahuolto.fi |

**Marka ay lumaan kaararka bangiyadu**

| | |
|---|---|
| American Express | 0800 114 646 |
| Diners Club | 0800 955 55 |
| Visa, Euro Card ama Mastercard | 0800 1 2400 |
| Kaarka bangiga | 020 333 |

Nambarka telefoon ee safaaradaada waxaad ka heleysaa nambarada wax la weydiiyo ama bogagga internetka ee wasaaradda arrimaha dibadda www.formin.fi .
Nambarka safaaradeyda:

Soo saarista: Maahanmuuttoinfo -hanke (ESR)
Muuqaalka sawirka iyo habeynta: Mari Villanen/ Pisama Art
Sawirada: Luiza Lehtinen

**Kumppanuustalo**
Kirjastokatu 1
tel. (03) 621 2560

Baro luqada finnishka – Learn Finnish
Hel wax aad sameyso– Find out what´s happening
Ma u baahantahay meel aad wax ku qabsato? – Do you need place for group activites?
Soo booqo– Welcome!



Vipuvoimaa EU:lta 2007–2013
Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto
Elinkeino-, liikenne- ja ympäristökeskus